

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 23 ^{AAD}	CADADKA 12 ^{AAD}	TAARIIKH:20/12/23	Lam.12
---------------------------	---------------------------	-------------------	--------

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

Sharciga Cashuuraha Berriga Dowladda Puntland

TUSMADA	
Qeybta 1 ^{aad}	Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah Sharciga Cashuuraha Berriga Dowladda Puntland.
Qeybta 2 ^{aad}	Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha. WAXBA MALEH
Qeybta 3 ^{aad}	Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda. WAXBA MALEH
Qeybta 4 ^{aad}	Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha. WAXBA MALEH
Qeybta 5 ^{aad}	Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda. WAXBA MALEH



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr. 11 ee 20-ka December 2023, kuna saabsan Sharciga
Cashuuraha Berriga Dowladda Puntland.

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad
farqadiisa 16-aad.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee
Summadeedu tahay XGGW/DPL/78/2023, kuna
taariikhaysan 10-ka December 2023.

Markuu Tixgeliyey: Baahida loo qabo Sharciga Cashuuraha Berriga
Dowladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1^{aad}


Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Cashuuraha Berriga Dowladda
Puntland.

Qodobka 2^{aad}


Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska
Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska
Garyaqaanka Guud ee Dowladda

Qodobka 3^{aad}

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo
laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland


Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland





**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND**

**XEERKA CASHUURAHA BERRIGA
DAWLADDA PUNTLAND**

Garoowe, Desember, 2023

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA



ولاية بونت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/78/2023 Garoowe, Axad, Taariikh: - 10/12/2023

Ku: - Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:-Ansixinta Xeerka Cashuuraha Berriga Dawladda Puntland

Mudane Madaxweyne,

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -

MARKUU ARKAY: -

Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY: -

Soo gudbinta Madaxweynaha Ref:
MW/DPS/106/2023 ee July 3, 2022, kuna saabsan
Xeerka Cashuuraha Berriga Puntland.

MARKUU TIX-GELIYEEY: -

Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Cashuuraha
Berriga Dawladda Puntland.

MARKUU DHEGEYSTEEY: -

Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga
53-aad, Fadhigiisii 9-aad ee 14.11.2023 cod gacanta
tag ah ku Ansixiyey Xeerka Cashuuraha Berriga
Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (37)
Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (30) Mudane,
Diidmo (2) Mudane, halka ay ka aamuseen (5)
Mudane.

WUXUU GUDDOOMIYEEY: -

Ansixinta Xeerka Cashuuraha Berriga Dawladda Puntland.

Wada Shaqeyn Wacan

Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Tusmadda Xeerka

CUTUBKA 1-aad	1
QODOBO HORDHAC AH.....	1
Qodobka 1-aad	1
Magaca Xeerka	1
Qodobka 2-aad.....	1
Erey Bixinta Xeerka	1
Ereyga	1
Qodobka 3-aad.....	4
Qodobka 4-aad.....	4
Baaxadda Xeerkan	4
Qodobka 5-aad.....	5
Waajibaadka Muwaadinka	5
Qodobka 6-aad.....	5
Ururinta Dakhliga Dawladda	5
Qodobka 7-aad.....	5
Caddaymaha Cashuurta.....	5
CUTUBKA 2-aad.....	5
QODOBADDA GUUD EE CASHUURTA DAKHLIGA (Income Tax).....	5
Qodobka 8-aad.....	5
Dhakhliga la cashuurayo	5
Qodobka 9-aad.....	6
Ilaaha Dakhliga La Cashuurayo (Taxable Source Of Income).....	6
Qodobka 10-aad.....	6
Muddo Cashuureedka	6
Qodobka 11-aad	7
Deganaashaha.....	7
Qodobka 12-aad.....	8
Waajibaadka Wakiilka	8
Qodobka 13-aad.....	8
Cashuurta Ku Waajibaysa Lamaanaha iska qaba	8
Qodobka 14-aad.....	8
Tix-galinta Cashuurta Dibedda Puntland Lagu Bixiyey.....	8



Qodobka 15-aad.....	9
Mamnuucida In Cashuur Laga Qaado Mar.....	9
Wax Ka Badan Dakhli Isku Mid Ah.....	9
Qodobka 16-aad.....	9
Caddaynta Cashuurta Dakhliga.....	9
Qodobka 17-aad.....	10
Bixinta Cashuurta Dakhliga Sannadka.....	10
Qodobka 18aad.....	11
Lacag -Bixinta Saddex Biloodka ah.....	11
CUTUBKA 3-aad.....	11
CASHUURTA DAKHLIGA QOFKA (PERSONAL INCOME.....	11
(TAX).....	11
Qodobka 19-aad.....	11
Cashuurta Dakhliga Qofka.....	11
Qodobka 20-aad.....	11
Noocyada Cashuur Bixiyaasha La Qiimeynayo.....	11
Qodobka 21-aad.....	12
Qiimaha La Cashuurayo.....	12
Qodobka 22-aad.....	13
Qaybaha Dakhli Shaqo.....	13
Qodobka 23-aad.....	13
Lacag Bixinnada Laga Dhaafay Cashuurta Dakhliga Shaqada.....	13
Qodobka 24-aad.....	14
Dadka Laga Dhaafayo Cashuurta Dakhliga Shaqada.....	14
Qodobka 25-aad.....	14
Gunnooyinka aan lacagta ahayn.....	14
Qodobka 26-aad.....	15
Hawl-gabka Iyo Taakulooyinka.....	15
Qodobka 27-aad.....	15
Cashuurta Dakhliga Shaqaalaha Xoogsatadda ah (Casual Labour).....	15
Qodobka 28-aad.....	15
Cashuurta Guddiyadda Sare.....	15
Qodobka 29-aad.....	15



Qaabka Bixinta Cashuurta dakhliga Shaqada	15
Qodobka 30-aad	16
Cashuurta Dakhliga Kiraynta	16
Qodobka 31-aad	16
Dakhliga Kiraynta Hantida	16
Qodobka 32-aad	16
Dakhliga Kiraynta Laga Dhaafay Cashuurta	16
Qodobka 33-aad	17
Cashuurta Dakhliga Kiraynta	17
Qodobka 34-aad	17
Xisaabinta Faa'iidada Ganacsiga	17
Qodobka 35-aad	17
Faa'iidada Cashuurta Ku Salaysan Qiyaasta	17
Qodobka 36-aad	18
Ka Macaashida Hantida Ku Jirta Lacagta Qalaad	18
Qodobka 37-aad	18
Xisaabinta Macaashka Ganacsi Ee Ku	18
Xiran Qandaraas Muddo Dheer	18
Qodobka 38-aad	18
Kharashaadka La Oggol yahay In Laga Gooyo	18
Dakhliga La Cashuuri Karo	18
Qodobka 39-aad	19
Kharashyada Aan Laga Goyn Karin	19
Dakhliga La Cashuuri Karo	19
Qodobka 40-aad	19
Qiima Dhaca (Depreciation)	19
Qodobka 41-aad	20
Qiima-Dhaca Hantida	20
Qodobka 42-aad	21
Kharashaadka Tababarrada Iyo Cilmibaarista	21
Qodobka 43-aad	21
Deyn Xumaatay (Bad debt)	21
Qodobka 44-aad	22



Khasaare wali taagan (Loss Carried Forward)	22
Qodobka 45-aad	22
Qiimaynta Kala Wareejinta Sicirka Ee shirkadaha	22
Xirirka Leh (Transfer Pricing Between Related Companies)	22
Qodobka 46-aad	22
Dakhli Maaliyadeedka (Financial Income)	22
Qodobka 47-aad	23
Dakhliga Macaashka Lahaanshaha (Royalty Income)	23
CUTUBKA 4-aad	23
CASHUURTA DAKHLIGA SHIRKADAHA (Corporate Income Tax)	23
Qodobka 48-aad	23
Cashuurta Dakhliga Shirkadaha	23
Qodobka 49-aad	24
Cashuur Bixiyeyaasha Ku Waajibtay Cashuurta Dakhliga Shirkadaha	24
Qodobka 50-aad	24
Shirkadaha Laga Dhaafay Cashuurta Dakhliga	24
Qodobka 51-aad	24
Baaxadda Mas'uuliyadda Cashuurta Dakhliga Shirkadaha	24
Qodobka 52-aad	25
Qiimaha Laga Cashuurayo	25
Qodobka 53-aad	25
Qaabka Cashuurta Dakhliga Shirkadaha (Corporate Income Taxation)	25
Qodobka 54-aad	25
Shirkadaha Wadaagga Dawladda Iyo Dadka (Public Private Partnership)	25
Qodobka 55-aad	25
Cashuurta Dakhliga Ka Soo Gala Kirada Hantida Guurtada Iyo Ma Guurtada Ah ..	25
Qodobka 56-aad	26
Dib-U-Habaynta Shirkada	26
Qodobka 57-aad	26
Cashuuraha Shirkadaha Dib U Habaynta Lagu Sameeyey	26
Qodobka 58-aad	26
Cashuurta Shirkad Kacday (Musaliftay)	26
CUTUBKA 5-aad	27




CASHUURTA DHEEFTA HANTIDA (CAPITAL GAIN TAX)	27
Qodobka 59-aad	27
Cashuurta Dheefta Hantida	27
Qodobka 60- aad	27
Hantida Ay Ku Waajibtay Cashuurta	27
Dheefta Hantida	27
Qodobka 61-aad	27
Hantida Laga Dhaafay	27
Cashuurta Dheefta Hantida.	27
Qodobka 62-aad	27
Qaabka Xisaabinta Cashuurta Dheefta Hantida	27
Qodobka 63-aad	28
Caddaynta Iyo Bixinta Cashuurta Dheefta Hantida.	28
CUTUBKA 6-aad	28
CASHUUR KA REEBID (WITHHOLDING TAX)	28
Qodobka 64-aad	28
Cashuur Ka Reebidda	28
Qodobka 65-aad	28
Cashuur Ka Reebidda Cashuuraha Qofka	28
Qodobka 66-aad	29
Cashuurta Ka Reebidda Cid kasta oo Ma Deggane Ah.	29
Qodobka 67-aad	29
Cashuurta Qofka aan Loo Samayn Cashuur Ka Reebid	29
Qodobka 68-aad	29
Cashuur Ka Reebidda Alaabta Ganacsiga ah ee La Soo Dajiyo	29
Qodobka 69-aad	30
Cashuur Ka Reebidda Qandaraasyadda	30
Qodobka 70-aad	30
Wakhtiga La Caddaynayo lana bixinayo Cashuur Ka Reebidda	30
Qodobka 71-aad	30
Ku Guuldareysiga In La Reebo Cashuurta	30
Qodobka 72-aad	31
Diiwaanka Lagu Hayo Cashuur Ka Reebidda	31



CUTUBKA 7-aad	31
CASHUURTA DIIWAAN-GALINTA (Registration Tax)	31
Qodobka 73-aad	31
Cashuurta Diiwaan-gelinta	31
Qodobka 74-aad	31
Falalka Iyo Qoraallada Cashuurtu Ku Waajibayso	31
Qodobka 75-aad	32
Diyaarinta Qoraallada	32
Qodobka 76-aad	32
Caddaynta Bixinta Cashuurta Diiwaan-galinta	32
Qodobka 77-aad	32
Qoraallada Laga Dhaafay Cashuurta Diiwaan-gelinta	32
Qodobka 78-aad	32
Qiimaha La Cashuurayo Diiwaan-galinnadda	32
Qodobka 79-aad	32
Cashuurta Diiwaan-galinta Kala Wareejinta Hantida	32
Qodobka 80-aad	33
Qaabka Cashuurta Kala Wareejinnada	33
Qodobka 81-aad	33
Hantida Laga Dhaafay Kala Wareejinnada	33
Qodobka 82-aad	33
Taariikhda Caddaynta Cashuurta Dakhliga Hantida la kala Wareejiyo	33
Qodobka 83-aad	34
Qiimaha La Cashuurayo Dakhliga Kala Wareejinnada Hantida	34
CUTUBKA 8-aad	34
CASHUURTA GADISTA	34
Qodobka 84-aad	34
Cashuurta Gadista	34
Qodobka 85-aad	34
Adeegyada Iyo Badeecadaha ay Ku Waajibayso	34
Cashuurta Gadista	34
Qodobka 86-aad	35
Fulinta Waajibaadka Cashuurta Gadista	35



Qodobka 87-aad	35
Adeegyadda Iyo Badeecadaha Laga	35
Dhaafay Cashuurta Gadista.....	35
Qodobka 88-aad.....	35
Qaabka Daabacadda Qaansheegadka.....	35
Qodobka 89-aad.....	36
Sugidda Qiimaha La Cashuurayo.....	36
Qodobka 90-aad.....	37
Qiimaha La Cashuurayo.....	37
Qodobka 91-aad.....	37
Caddaynta Cashuurta Gadista.....	37
Qodobka 92-aad	38
Soo Xareynta Cashuur Gadista.....	38
CUTUBKA 9-aad.....	38
CASHUURTA WADDA MARISTA (ROAD TAX).....	38
Qodobka 93-aad	38
Cashuurta Wadda Marista.....	38
Qodobka 94-aad.....	38
Diiwaan-galinta Gaadiidka ay Ku Waajibtay	38
Cashuurta Wadda Maristu	38
Qodobka 95-aad	38
Gaadiidka leh Cashuur Dhaafka Joogtada ah.....	38
Qodobka 96-aad.....	39
Oggolaansho Fasax Ku Meel gaar Ah	39
Qodobka 97-aad	39
Wadashada Warqadda Caddeynta Bixinta Cashuurta.....	39
Qodobka 98-aad.....	40
Qaabka Qaadista Cashuurta Gaadiidka.....	40
Qodobka 99-aad.....	40
Qiimaha La Cashuurayo Cashuurta Wadda Marista	40
Qodobka 100-aad.....	40
Ku Guul Daraysiga Bixinta Cashuurta Wadda Marista	40
Qodobka 101-aad.....	41



Baabuurta Fadhida ee Aan Shaqeynayn	41
CUTUBKA 10-aad	41
CASHUURTA MOORKA (Stamp Tax).....	41
Qodobka 102-aad.....	41
Cashuurta Moorka.....	41
Qodobka 103-aad.....	41
Bixinta Cashuurta Moorka (Stamp Tax).....	41
Qodobka 104-aad.....	42
Qiimayaasha Cashuurta Moorka Cayiman	42
Qodobka 105-aad	43
Cashuurta Moorka Ee Boqolleyda ah (Proportional Tax)	43
Qodobka 106-aad.....	43
Qoraallada Laga Dhaafayo Cashuurta Moorka	43
Qodobka 107-aad	44
Been Abuurka Iyo Laba Jeer Adeegsiga Moorka	44
Qodobka 108-aad.....	44
Gaddida Iyo Isticmaalka Tigidyada.....	44
Iyo Warqadaha Moorka.....	44
Qodobka 109-aad.....	44
Xil Gudashada Cashuurta Moorka.....	44
Qodobka 110-aad.....	44
Qiima Dhaca Tigidyada (faraka bollo) Moorka.....	44
CUTUBKA 11-aad	45
DAKHLIYADDA KALE	45
Qodobka 111-aad	45
Ganaaxyada.....	45
Qodobka 112-aad.....	45
Ajuurooyinka Iyo Shatiyada.....	45
CUTUBKA 12-aad.....	46
QODOBADA QUBANAHA AH EE XEERKA.....	46
Qodobka 113-aad.....	46
Shaxaha Cashuuraha	46
Qodobka 114-aad.....	46



Xeer-nidaamiye	46
Qodobka 115-aad	46
Burin/Laalid	46
Qodobka 116-aad	46
Dhaqan-galka Xeerka	46
Lifaaqa Kawaad: Cashuur Ka reebid (la xariira Qodobka 65-aad)	47
Lifaaqa Labaad: Shaxaha Cashuuraha (La xariira qodobka 113-aad)	48



CUTUBKA 1-aad

QODOBO HORDHAC AH

Qodobka 1-aad

Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka Cashuuraha Berriga Dawladda Puntland".

Qodobka 2-aad

Erey Bixinta Xeerka

Haddii aan Xeerkan si kale loogu sheegin, macnaha ereyada soo socda waxaa loola jeedaa sidan;

L.r	Ereyga	Macnaha
1.	Dastuur	Waxaa loola jeedaa Dastuurka dawladda Puntland ee Soomaaliya.
2.	Wasaarad	Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda Dawladda Puntland.
3.	Wasiir	Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dawladda Puntland.
4.	Adeeg Bixiye	Waxaa loola jeedaa Waa cashuur-bixiye kasta oo bixiya adeeg.
5.	Caddaynta/Xareynta cashuurta (Tax declaration/return)	Waxaa loola jeedaa qaabaysane (Form) lagu muujiyo warbixinta dhaqdhaqaaqa ay cashuurta ku waajibtay.
6.	Cashuur bixiye	Waxaa loola jeedaa cid kasta oo hela qadar cashuur galka ah sida xeerkan waafaqsan waxaana ku jira kuwan: - I. Qof kasta oo gala khasaare la qiimeeyey sannad dakhliyeedka. II. Ujeeddo kasta oo waajibinaysa xisaab celin ama qof kasta uu xeerku farayo keenista xisaab celin.
7.	Cashuur ka reebid (Withholding Tax)	Waxaa loola jeeda in cashuur laga reebo qof kasta oo cashuur ku waajibtay kaasoo uu ka reebayo qofka siinaya lacagta dakhli ee uu kasbaday kan laga reebayo, iyadoo lagu caddeeyey lifaaqa koowaad ee xeerkan.



8.	Cashuur/dakhli(Revenue/Tax)	Waxaa loola jeeda lacag ka timid cashuuro, ajuurooyin, hanti dawladdeed oo la gaday, la xaraashay ama la kireeyey, deeqaha, ganaax, ama lacago kale uu xeerkani soo rogay.
9.	Cidkasta	Waxaa loola jeeda qof ama shirkad kasta.
10.	Dakhli(Income)	Waxaa loola jeeda lacag soo gashay qof ama shirkad ay ku heleen adeeg ay qabteen, hawlo shaqo ama laga helay maalgashi.
11.	Faa'iido/Macaash (Profit)	Waxaa loola jeedaa faa'iidada maaliyadeed oo lagu kasbaday marka macaashkaagu ka bato kharashaadkaaga iyo qiimaha asalka ah.
12.	Gaadiid	Waxaa loola jeedaa Gaadiidka dhulka sida baabuur nooc kasta, bajaaj, mooto iyo IWM.
13.	Ganacsade Jumlo	Waxaa loola jeedaa cid kasta oo awood sharciyadeed u leh in ay badeecad jumlo ah ama xoolo nool ah soo galiyeen ama ka dhoofiyaan gudaha Puntland.
14.	Ganacsi	Waxaa loola jeedaa wax iibisiga iyo gadashadda sharciga waafaqsan.
15.	Loo shaqeeye	Waxaa loola jeeda qof, shirkad, hay'ad ama urur hawlgeliya shaqaale muddo cayimin bixiyana xuquuqdooda shaqaalanimo.
16.	Maamulka Dakhliga/Cashuuraha	Waxaa loola jeedaa waaxda u qaabilsan Wasaaradda Maaliyadda soo uruurinta, dabagalka, ilaalinta iyo adeeg bixinta dakhliga.
17.	Mabaadi'da xisaabaadka guud	Waxaa loola jeeda nidaam xisaabeed caalami ah, taasoo dunida laysla ogolyahay, hay'adda caalamiga ah IFAC ay aqoonsan tahay. Waxaa uu noqon karaa GAAP ama IFRS ama wixii la halmaala
18.	Moor	Waxaa loola jeeda cashuur raacda cashuur kale waana laba nooc mid sawir ah oo lagu dhajiyo qoraalladda loo adeegsado hab sharci ah iyo mid boqolay ahaan loo xisaabo oo lagu dhuftay cashuur kale ama qaansheegad.
19.	Qof	Waxaa loola jeeda qof caadiya ah, wadaage saami, xirfadle kaligii ah, Amaano-haye, shirkadle, hawl-gab, ka tirsan dawladda, urur ama hay'ad la cayimay.



20.	Saami	Waxaa loola jeeda qayb kamid ah hanti la wada leeyahay, saldhigna u ah qaybsiga macaashka iyo khasaaraha, saamilaha wuxuu xaq u leeyahay faa'iidada saamigiisa uu ka helay inuu lacag ahaan u la baxo ama uu ku kororsado saamigiisa asalka ahaa.
21.	Sannad xisaabeed	Waxaa loola jeedaa xilliga Shirkadu u aqoonsan tahay in ay xisaabteeda sannadlaha ah xirato, sannad xisaabeedka waxaa uu waafaqi karaa sannad cashuureedka hadiise uu ka duwan yahay waxaa la raacayaa, sida uu qabo qodobka 11-aad ee xeerkan.
22.	Sannad Cashuureedka	Waxaa loola jeedaa bilowga sannadka bisha 1 janaayo wuxuuna ku dhammaanayaa 31 da Diseember sannad kasta, waxaana ku xiga xilliga cadaynta dakhliga iyo qiimaynta Cashuurta.
23.	Shaqaaale	Waxaa loola jeeda qof kasta oo fuliya hawl cayiman, taas bedel keeda helaya dakhli ama wax u dhigma.
24.	Shax	Waxaa loola jeeda jadwal lagu muujiyey qiimaha cashuurta laga rabo cashuur bixiyaha, waxaana ay ku cad yihiin lifaaqa danbe ee xeerkan
25.	Shirkad	Waxaa loola jeedaa hay'ad ama urur kasta oo leh jiritaan madax-bannaan oo qaanuuni ah isla markaana oogi karta laguna oogi karo dacwad, kana madax bannaan saamilayda, isla markaasna ay ku waajibtay cashuurta dakhliga shirkadaha (Corporate Income Tax).
26.	Soo Dejiye	Waxaa loola cid kasta oo badeecad soo galisa xuduudaha Puntland ee badaha, dhulka ama Garoomadda diyaaraha.
27.	Wakiilka sharciga ah	Waxaa loo jeeda wakiilka dadka garaadka ka dhiman oo aan waxba qabsan karin iyo dadka maqan. Wuxuu mas'uul ka yahay hubinta iyo qiimeynta dakhliga uu helay qofka wakiishay, wuxuu kaloo mas'uul ka yahay bixinta cashuuraha oo ku eg hantida loo wakiishay.
28.	Warshad	Waxaa loola jeedaa waa makiinado meel ku rakiban oo qalab cusub curin kara, qaarna dhalan rogi kara, kuwa kalena farsamayn kara.
29.	Warshadle	Waxaa loola jeedaa cid kasta oo warshad sharci ahaan u leh, qof, urur ama dawlad.



30.	Xilliga qiimaynta	Waxaa loola jeedaa xilliga ka danbeeya sannad cashuuredka oo ka bilowda 1 Janaanyo ilaa 31-da Maarso sannad kasta.
31.	Xirfadle	Waxaa loola jeeda qofka haysta Mihnad sida dakhtarnimo, qareen, xisaabiye ama xirfadle farsamo sida Inijaarka, Makaaniga iyo shaqooyinka la halmaala kaasoo ugu shaqaysto si madax bannaan dakhliina kasoo galo xirfadiisa

Qodobka 3-aad Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkani waa;-

1. Waa inuu qeexo qaybaha cashuuraha Berriga ee ka dhaqan galaya gudaha Puntland.
2. Waa inuu qeexo tallaabooyinka laga doonayo in uu qaado cashuur bixiye marka uu bixinayo cashuurta.
3. Kobcinta dakhliga Dawladda Puntland.
4. Waa in si siman loogu fuliyo dhammaan cid kasta oo cashuuri ku waajibtay, muwaadin iyo ajnabi.
5. Waa in uu tayeeyo fududiyana qaab Uruurinta Cashuuraha Bariga Puntland.
6. Waa in si cad Muwaadiniinta loogu Shaaciyo habka ururinta cashuuraha berriga Puntland.

Qodobka 4-aad Baaxadda Xeerkan

Xeerkan wuxuu ka khuseeyaa dakhli kasta iyo adeeg kasta oo laga helay ama laga fuliyey dhammaan dhulka Puntland, wuxuuna saamaynayaa dakhliyadda kala ah: -

1. Cashuurta dakhliga qofka (Personal Income Tax)
2. Cashuurta dakhliga shirkadaha (Corporate Income Tax)
3. Cashuurta Dheefta Hantida (Capital Gains Tax)
4. Cashuur ka reebid (With Holding Tax)
5. Cashuurta Diiwaan-galinta (Registration Tax)
6. Cashuurta gadista (Sales Tax)
7. Cashuurta Waddo marista (Road Tax)
8. Cashuurta Moorka (Stamp tax)
9. Ganaaxyada iyo Ciqaabta (Penalties and Fines)
10. Ajuurooyinka iyo shatiyada (Fees and licences)



Qodobka 5-aad
Waajibaadka Muwaadinka

1. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah, bixinta cashuuraha sida ku xusan Qodobka 40-aad xarafka (x) ee Dastuurka Dawladda Puntland.
2. Cidna lama weydiin karo cashuur aan lagu jidayn xeerkan iyo xeerarka kale ee cashuuraha dhaqangalka ah ee ka jira Puntland.

Qodobka 6-aad
Ururinta Dakhliga Dawladda

Wasaaradda Maaliyadda qaybteeda Maamulka dakhliga ama cidii ay wakiillato oo kaliya, ayaa uruurin kara cashuuraha uu waajibiyey xeerkan.

Qodobka 7-aad
Caddaymaha Cashuurta

1. Cid kasta oo cashuuri ku waajibtay, waxaa laga rabaa in ay soo buuxiyaan qaabaysanaha (Form) caddaynta cashuurta.
2. Caddeynta cashuurta waxaa la keenayaa xafiiska cashuuraha ee Gobollada iyo degmooyinka uu qofka/Shirkada cashuur bixiyaha ahi degan yahay ama ka diiwaan-gashan yahay.
3. Hay'ad ama shirkad leh laamo badan waxay cashuurta ku bixinaysaa xaruntooda dhexe (Head quarter).
4. Caddaynta cashuurta waxaa lagu soo buuxinayaa habka danabaysan (Electronic Systems) ama hab qoraalka ah. Maamulka dakhliga ayaa go'aan ka gaari kara waqtiga habka danabaysan oo kaliyaa lagu soo caddayn doono.

CUTUBKA 2-aad

QODOBADDA GUUD EE CASHUURTA DAKHLIGA (Income Tax)

Qodobka 8-aad

Dhakhliga la cashuurayo

Cashuurta dakhliga waxay ku waajibaysaa dakhliga laga helay gudaha Puntland, isagoo ku abuurmay qaab adeeg bixin, badeeco iibin, macaash rasumaal, shaqo ama farsamo.



Qodobka 9-aad

Ilaha Dakhliga La Cashuurayo (Taxable Source Of Income)

1. Adeegyada iyo shaqada nooc kasta oo ay tahay.
2. Hawlaha Xirfadlayaasha, Suugaanta masraxyada, Majaajilooyinka maaweelooyinka iyo ciyaaraha.
3. Adeegsiga, iibinta, kiraynta, wareejinta dhaxalka ama hibada ee hantida guurtada ah iyo ma guurtadaba.
4. Beerashada dalagga, ka ganacsiga xoolaha nool, kalluumaysiga, Macdanta, Shidaalka, hawlaha kaymaha iyo khayraadka dabiiciga ah ee laga helo dhulka korkiisa ama gudihisa.
5. Macaashka qandaraasyada iyo Heshiiyada.
6. Maalgelinta saamiyada shirkadaha.
7. Iibinta tooska ah ama dadban ee saamiyada ama deymaha.
8. Macaashka saamiyada oo dib loogu celinayo saamiyada raasumaalka.
9. Qaybsiga macaashka Wadaagga ah.
10. Dakhliga kasta oo laga helay ammaah wadanka gudihisa lagu qaatay.
11. Wareejinta, iibinta iyo kiraynta hantida
12. Dakhliga rarka Gaadiidka xamuulka ah.
13. Soo dajinta iyo dhoofinta Badeecadaha.
14. Macaashka adeegsiga xuquuqda lahaanshaha.
15. Cid kasta oo ka samaysa dakhli gudaha Puntland waxaa ku waajibaysaa cashuur.

Qodobka 10-aad

Muddo Cashuureedka

1. Sannad Cashuureedku wuxuu bilaabmaya 1-da Janaayo wuxuuna dhammaanayaa 31-da Diseember sannad kasta.
2. Haddii ay jiraan haya'do ganacsi ama maamul uu sannad xisaabeedkoodu ka duwan yahay kan lagu sheegay farqadda 1-aad ee qodobkan, waxaa looga baahan yahay qoraal ay usoo gudbiyaan maamulka dakhliga si loogu diiwaan-geliyo xili xisaabeedkooda loona oggolaado in ay isticmaalaan sannad xisaabeed u gaar ah, iyadoo soo buuxinaya shuruudaha soo socda: -
 - a. Waa inay soo bandhigaan muddadda cashuurta iyo sababo macquul ah oo lagu beddeli karo muddo cashuureedka.



- t. Waa in ay tahay hay'ad ay ku waajibtay cashuurta dakhliga shirkadaha.
 - j. Waa in ay hayaan xisaab xirkooda oo waafaqsan mabaadi'da xisaabaadka ee guud ahaan la aqbalay.
3. Marka waqtiga xisaabxirka cashuur bixiyuhu is beddelo, wuxuu soo caddaynayaa xilliga xisaab xirkiisa uu ka bilowday iyo goorta uu dhammaanayo. wuxuu kusoo beegayaa bilowga bisha. Ganacsiyadda cusub sannad xisaab xirkooda waxaa uu uga bilaamayaa xilliga la hawlgeliyey ganacsiga.
 4. Cashuurta dakhligu waxay ku waajibaysaa sannad kasta oo la qiimeeyo caddadka guud ee faa'iidada saafiga ah oo uu qofku ama shirkadu heshay muddada sannadka ah.
 5. Sannad Cashuureedku waa sannadka ka horeeyey Xilliga qiimaynta waana sannadka la helay dakhliga la cashuurayo.
 6. Macaashka faa'iida saafiga ah ee lagu caddeeyey faqrada 3-aad ee qodobkan wuxuu noqonayaa macaashka Cashuurta ku waajibtay qofka ama Shirkada la qiimeeyey.

Qodobka 11-aad

Deganaashaha

1. Deganaanshaha waxaa loo jeeda qof ama shirkad deggan gudaha Puntland, wuxuu noqon karaa muwaadin ama ajnabi sharci ku jooga, isla markaasna ka diiwaan-gashan maamulka Dakhliga. Degananshahaan waxaa uu ka duwan yahay degananshaha ay bixiso haya'dda socdaalka iyo jinsiyadda haddii aanu la xariirin deganansho shaqo ama ganacsi.
2. Qofku hadduu Puntland deggan yahay sannad cashuureed cayiman, waxaa loo aqoonsanyaa "Deggane" haduu buuxiyo qodobadda soo socda midkood: -
 - b. Qof ku leh Guri/Hoy Puntland.
 - t. Muwaadin Soomaaliyeed oo deggan oo ka shaqeeya gudaha Puntland.
 - j. Qof u dhashay ama ku dhashay Puntland.
 - x. Qof shaqo joogta ah ku haysta gudaha puntland.
 - kh. Qof u dhashay Puntland oo jooga meel ka baxsan Puntland.
 - d. In uu ku sugan yahay gudaha Puntland muddo dhan ama wadarteedu celcelis ahaan dhan tahay lix (6) bilood oo kamid ah 365 maalmood ee sannad cashuureedka la qiimaynayo.
 - r. In sannad cashuureedka la qiimaynayo iyo labadii sano oo ka horeeyey uu dalka gudihiiisa ku sugnaa mudo celcelis ahaan dhan afar (4) bilood 121 sannadkiiba.



- s. Shirkad walba oo leh shati ganacsi oo ka diwaan-gashan, kana hawlgasha gudaha Puntland waxay noqonaysaa deggane.

Qodobka 12-aad

Waajibaadka Wakiilka

1. Qofka garaadka ka dhiman ama aan waxba qabsan karin ee leh hawlo dakhli abuur, waxaa la qiimaynayaa cashuurta ku waajibtay, waxaana mas'uuliyadda bixinta cashuurta qaadaya wakiilkiisa sharciga ah.
2. Qofka aan degganayn dalka waxaa la qiimeynayaa cashuurta ku waajibaysa hantida iyo ganacsigiisaba, waxaana masuuliyadda bixinta cashuurta qaadaya wakiilkiisa sharciga ah ama maamulaha hantida.
3. Qofka ka maqan dalka, waa inuu magacowdaa wakiil sharci ah oo la wareega mas'uuliyadaha cashuuraha. Wakiilka waxaa looga baahan yahay inuu si qoraal ah ku soo wargeliyo maamulka dakhliga.
4. Haddii qofkaas ama wakiilkiisa sharciga ah ay magacaaban waayaan wakiil, kuna soo wargelin waayaan magacaabista xafiiska Maamulka dakhliga, waxaa sharci ahaan looga joojinayaa dhaqdhaqaaqa ganacsiga iyo isticmaalka hantida ilaa la helo wakiil sharci oo la wareega mas'uuliyadda cashuuraha.

Qodobka 13-aad

Cashuurta Ku Waajibaysa Lamaanaha iska qaba

1. Lamaanaha isqaba mid kasta gaarkiisa ayuu u bixinayaa cashuurta dakhliga si ku saleysan dakhligooda, haddii ilaha dakhligoodu kala gaar yahay ama uu ka abuurmo ganacsiyo kala madax bannaan.
2. Haddii lamaanaga isqaba sayga iyo ooridiisa ay ganacsi wadaagaan ama hanti wada leeyihiin, cashuurta waxaa lagu qaadayaa magaca labada is qaba midkood ee fuliya hawsha muhiimka ah, iyadoo la tix-galinayo raali ahaanshahooda.

Qodobka 14-aad

Tix-galinta Cashuurta Dibedda Puntland Lagu Bixiyey

1. Haddii inta lugu jiro sannad cashuureedka, qof deggan Puntland uu helo dakhli ka abuurmay hawl qabad Puntland ka baxsan, marka uu bixinayo cashuuraha Puntland waxaa loo tix-galinayaa qaybihii uu ku bixiyey dibedda Puntland, kadib marka uu soo



- caddeeyo cashuurta ku waajibtay iyo qeybta uu ku bixiyey dibadda Puntland oo wadata caddaymaha lacag qabashadda rasmiga ah iyo midka heshiiska uu howsha u galay.
2. Tix-gelinta cashuurta dakhliga ee ku xusan farqadda 1-aad ee qodobkan, haddii cashuurta lagu qaaday dibedda Puntland ay ka hoosayso heer cashuureedka Puntland, cashuur bixiyaha waxaa ku waajibaya in uu bixiyo dhinnaanshaha maqan.

Qodobka 15-aad

Mamnuucida In Cashuur Laga Qaado Mar

Wax Ka Badan Dakhli Isku Mid Ah

1. Dakhli laba jeer la cashuuri karo ma jiro, xitaa haddii qofka ama shirkada magacyadooda isbedelaan.
2. Heshiisyadda ka hoos abuurma heshiis kale (sub contract), waxaa gaar loogu yeelanayaa cashuuraha ku waajibay, xitaa haddii ay isha dakhliga ay la mid tahay heshiiska asalka ahaa.

Qodobka 16-aad

Caddaynta Cashuurta Dakhliga

1. Xilliga caddaynta cashuurta Dakhliga sannadka waxay bilaabanaysaa 1da Janaayo waxayna soconaysaa ilaa 31-da Maarso, muddadaas cashuur bixiye kasta wuxuu fursad u haystaa in uu soo caddeeyo dakhliga sannadkii la soo dhaafay.
2. Cid kasta oo deggane ah kana diiwaan-gashan maamulka dakhliga, waxaa waajib ku ah in ay soo xarayso caddaynta cashuurta dakhliga sannadka, si waafaqsan habraacyada maamulka dakhliga, ugu dambayn 31da Maarso ee xilliga caddaynta cashuurta.
3. Haddii aan wax dakhli ah ka soo galin gudaha Puntland waa inuu keenaa caddayn muujinaysa in macaashkiisu aan la helin sannad cashuureedkaas (Zero declaration). ciddii uu ku guul daraysta inay soo caddayn waayaan waxaa laga qaadayaa ganaaxyadda lagu caddeeyey qodobka 111-aad ee xeerkan.
4. Cid kasta oo fulisa wax qabadyada dakhli abuur, waa inay usoo gudbiyaan Maamulka dakhliga, qaabaysanaha (Form) caddaynta cashuurta, iyadoo ay weheliso xisaab xirka xaashida dheelitirka (Statement of Financial Position) iyo xisaab xirka faa'iidada & khasaaraha (Statement of Profit or loss and comprehensive income), diiwaanka gadashada badeecadda (Goods Received Note) ama wax soo-saarka warshadda (Manufacture Registry) iyo lifaaqyada kale ee muhiimka ah ee muddo cashuureedkaa,



iyadoo loo eegayo mabaadi'da xisaabaadka guud ee laysla aqoonsan yahay ee caalamiga ah iyo dukumenti kasta oo kale oo khuseeya oo ay u baahan yihiin maamulka dakhliga.

5. Cashuur bixiyaasha isticmaala sannad cashuureed ka duwan midka maamulka Dakhliga, sida lagu caddeeyey qodobka 10-aad farqadiisa 2-aad ee xeerkan waxay ku khasban yihiin inay haystaan caddaynta cashuur sannadeedka iyo xisaab xiradda maaliyadeed oo uu dheelitiray hubiyeyna xirfadle xisaabeed la aqoonsan yahay.

Qodobka 17-aad

Bixinta Cashuurta Dakhliga Sannadka

1. Kadib cadaynta cashuurta macaashka sannadka, waxaa maamulka dakhligu ku samayn doonaan qiimayn iyo hubin qoraallada uu soo gudbiyey cashuur bixiyaha ugu badnaan muddo saddex isbuuc ah, waxayna u diri doonan qoraal qiimaynta cashuurta ah.
2. Cashuur bixiyihii hubinta iyo qiimaynta lagu helo khaladaad maaliyeed ama ka been sheegid iyo cashuur bixiyaha kadib dhaca xilliga kama dambaysta ah ee bixinta cashuurta waxaa laga qaadayaa ganaaxyadda lagu cadeeyey qodobka 111-aad ee xeerkan.
3. Cashuurta macaashka waxaa lagu bixinayaa ugu dambayn 15 May ee sannadka ku xiga xilliga macaashka la helay, iyadoo loo marayo habraacyada maamulka Dakhliga.
4. Cashuurta macaashka uu bixinayo cashuur bixiyuhu, waxaa laga dhimayaa (Reduce) kuwa soo socda: -
 - a. Cashuur ka reebid hore ee cashuurta macaashka.
 - b. Cashuur khusaysa midka sannadka oo uu horay u bixiyey inta lagu guda jiray sannad cashuureedka.
5. Ka reebid cashuureed ama horumarin ka badan cadadka waajibaadka cashuurta ee lagu xisaabiyey Faqrada 4-aad ee qodobkan, waxaa maamulka dakhliga u qaadanayaa haddii ay jirtay cashuur hore ee ku taagnayd ama waxaa loogu kaydinayaa bixinta wixii cashuur dambe ee lagu yeesho.
6. Shirkadaha ay ku waajibtay cashuurta dakhligu oo ku guuldaraysta caddaynta cashuur sannadeedka, Wasiirka Wasaaradda ayaa ku soo saaraya wareegto lagu waajibinayo cashuur fidsan (Flat) oo shirkad walba ay tahay in ay bixiso sannad cashuureedkaas, kadib qiimaynta ay usoo gudbiyeen maamulka dakhliga oo u dhigmaysa cashuurtii dakhliga ee ku waajibtay sannadka.



Qodobka 18aad

Lacag -Bixinta Saddex Biloodka ah

1. Cashuur bixiyaha aan ku bixin karin cashuurta faa'iidada sannadka halmar, waxaa uu soo gudbinayaa dhammaan caddaymaha taageeraya sababta uu u bixin karin cashuurta halmar, kadib qiimaynta maamulka dakhliga, waxay qoraal ku ogaysiin doonaan cashuur bixiyaha in la aqbalay codsiigiisa iyo in kale.
2. Haddii loo oggolaado codsiigiisa, cashuur bixiyuhu waa inuu ku bixiyaa cashuurta sannadka loo qiimeeyey kama dambayn 2-da Maajo, 2-da Agoosto iyo 2-da November xilli cashuureedka. Ugu badnaan saddex qaybood buu u qaybsan karaa cashuurta ku waajibtay mar walbana waa inuu bixiyo ugu yaraan soddon iyo saddax boqolkiiba (33%) waajibaadka cashuurta.
3. Haddii cashuur bixiyuhu isticmaalo xisaab xir sannadeed ka duwan sannad cashuureedka xeerkan (Fiscal Year) waxaa la waafajinayaa qodobka 9-aad ee xeerkan.

CUTUBKA 3-aad

CASHUURTA DAKHLIGA QOFKA (PERSONAL INCOME

(TAX)

Qodobka 19-aad

Cashuurta Dakhliga Qofka

Cashuurta dakhliga qofka waxay ku waajibaysa qof kasta oo ka hela dakhli shaqo, xirfad, ganacsi ama wixii la mid ah.

Qodobka 20-aad

Noocyada Cashuur Bixiyaasha La Qiimeynayo

1. Sannad cashuureed kasta, cashuur bixiye deggan kana diiwaan-gashan Maamulka dakhliga waxaa ku waajib ah in uu bixiyo cashuurta dakhliga ee uu ka helay dhammaan ilaha dakhli ee lagu xusay Qodobka 9-aad ee xeerkan.
2. Cashuur bixiye aan degganayn Puntland wuxuu mas'uul ka yahay oo keliya cashuurta Dakhliga shaqsiyeed ee ka soo galay gudaha Puntland.



Qodobka 21-aad

Qiimaha La Cashuurayo.

1. Ganacsiyada iyo xirfadlayaasha waxaa lagu cashuurayaa qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.1 ee Cashuurta faa'iidada macaashka ganacsiga iyo xirfadlayaasha iyadoo raacaya habka caddaynta cashuuraha ee lagu xusay qodobka 16-aad ee xeerkan.
2. Ganacsiyadda iyo xirfadlayaasha ay ku adkaato in raacaan habka caddaynta cashuuraha ee lagu xusay qodobka 16-aad ee xeerkan waxaa lagu qiimayn doona cashuurta qiyaasta, iyadoo lagu cadeeyey Shaxaha 3.2 ee cashuurta qiyaasta.
3. Ganacsiyadda iyo xirfadlayaasha ayaa laga yaabaa inay ka tanaasulaan cashuurta qiyaasta ah, iyadoo dooranaya nidaamka dhabta ah ee fulinta xisaabaadka si waafaqsan qodobka 16-aad ee xeerkan. Marka ay doortaan nidaamka dhabta ah, waa inay ka codsadaan maamulka dakhliga go'aankana waa mid aan ka noqosho lahayn muddo saddex (3) sano ah oo ka bilaabmaysa taariikhda maamulka dakhligu ay oggolaadeen.
4. Iyadoo aan waxba loo dhimayn habka lagu maamulayo nidaamka cashuurta faa'iidada dhabta ah, baabuurta xamuulka ah ee badeecadaha noocyaddooda kala gooshiya, waxaa laga qaadayaa cashuur xadidan oo qiimaha lagu cashuurayana lagu cadeeyey Shaxda 3.3-aad ee Cashuurta Macaashka Gaadiidka Xamuulka.
5. Wax-soo-saarka beeraha waxaa la qiimaynayaa sannadkiiba laba jeer, taasoo lagu salaynayo dalagyadda kasoo go'ay iyo kharashaadka muhiimka ah ee ku baxay oo ay ku jirto dalagyada xumaada. Qiimaynta waxaa habraac gaar ah kusoo saaraya maamulka dakhliga. waxaana la cashuurayaa qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.4 ee Cashuurta Macaashka Wax-soo-saarka Beeraha.
6. Macaashka saami qaybsiga waa dakhliga ka soo gala dhammaan meel kasta oo saami bixisa, caddaynta dakhliga sannadka ee shaqsigu, waxaa lagu soo darayaa macaashka uu ka helay saamiga waxaana la cashuurayaa Qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.5 ee cashuurta Macaashka Saamiga.
7. Dakhliga lagu kasbado hawlo shaqo oo muddo kooban ah oo uu helo ma deganne sida; khabiir, xirfadle, farsamayaqaan, fannaan, ciyaartooy, ciyaar dhaqameed iyo masraxiyahan, waxaa ku waajibaysa cashuurta dakhliga ee mar qaadka ah ee qiimaheeda lagu cadeeyey Shaxda 3.6 ee cashuurta dakhliga mar qaadka .



8. Dakhliga kirooyinka waxaa lagu cashuurayaa Qiimaha lagu caddeeyey Shaxda 3.7 ee Cashuurta Dakhliga kirooyinka, waxaana laga cashuurayaa 80% dakhliga kiradda.
9. Cashuurta Dakhliga Shaqada waxaa la cashuurayaa qiimaha lagu caddeeyey Shaxda 3.7 ee Cashuurta Dakhliga Shaqada.

Qodobka 22-aad
Qaybaha Dakhli Shaqo

1. Dakhli shaqo waxaa ku jira dhammaan lacagihii uu loo shaqeeyuhu siiyey shaqaale ee loo bixiyey si caddaan ah ama saami kordhin. Lacagahaas waxay ka kooban yihiin kuwa soo socda.
 - b. Mushahaar (bille, Todobaadle ama maalinle, gunno fasax, gunno bukaan iyo caafimaad, fasixiisa oo lacag loo siiyey, khidmadaha, gunnooyinka iyo abaalmarinadda.
 - t. Gunnooyinka aan lacagta ahayn, gunnada guriga, gaariga iyo madadaalada, safarka iyo shaqo dheeri ah.
 - j. Bixin kasta ama dib ugu celin kharashyada uu galay shaqaale ama la hawl-galaha ama kalkaaliyaal la shaqeeyey.
 - x. Lacag siinta shaqaalaha ku shaqeeya xaalado shaqo oo gaar ah ama adag.
 - Kh. Mushaharka iyo gunnooyinka loo bixiyo si horumarin ah (advance payment)
 - D. Qaadashadda hawl-gabka iyo liiltirka.

Qodobka 23-aad
Lacag Bixinnada Laga Dhaafay Cashuurta Dakhliga Shaqada

Lacagaha soo socda kuma jiraan xisaabinta dakhliga shaqada la cashuuri karo: -

1. Tabarucaadka shaqaale u siiyey hay'adaha daryeelka bulshadda ee maxaliga oo aan ka badnayn 10% Dakhliga guud (Gross) ee shaqada.
2. Hawl-gabka iyo liil-tirka laga jaro shaqaalaha oo lagu kaydiyo hay'ada dawliga ah ee mas'uul ka ah ilaalinta bulshada ama sanduuq hawlgab oo la aqoonsan yahay.



Qodobka 24-aad
Dadka Laga Dhaafayo Cashuurta Dakhliga Shaqada

1. Shaqsi kasta oo kale oo ka shaqeeya Safaarad, ergay, Qunsuliyad oo fuliya arrimaha Dawladda uu u dhashay oo haysta baasaboort diblomaasiyadeed.
2. Shaqaalaha Qaramada midoobay ee joogtada ah, taasoo waafaqsan heshiisyada caalamiga ah ee xagga mushaharooyinkooda iyo dakhliyadda kale ee kasoo gala shaqadooda.
3. Heshiis lala galay Dawladda Soomaaliya si waafaqsan xeerarka soomaaliya iyo kan Puntland.

Qodobka 25-aad
Gunnooyinka aan lacagta ahayn

1. Gunnooyinka aan lacagta ahayn ee uu helay shaqaale waxaa lagu darayaa dakhiga shaqo ee la cashuuri karo, iyadoo la tix-galinayo qiimaha suuqa.
2. Gaadiidka iyo guryaha uu leeyahay loo shaqeeyaha ee uu u isticmaalo qof shaqaala si gaar ah inta lagu guda jiro xilli cashuureedka, waxaa lagu qiimayn doona sicirka lagu kireeyo gaadiidka ama guriga noociisa ah, waxaana qiimaha lagu caddeeyey shaxda 3.8 ee Gunnooyinka aan lacagta ahayn, lagu dari doona dakhliga qofka ee la cashuurayo.
3. Lacag bixinnadda soo socda waxaa loo qiimaynayaa sida gunnooyinka oo kale loomana aqoonsanayo Gunnooyin aan lacag ahayn.
 - b. Gunnooyinka taageerada loo shaqeeyaha uu siiyo qof qaraabo la'ah oo shaqaale ah markaasna uusan jirin adeeg la bixiyey oo u dhigma.
 - t. Gunnooyinka taageerada ay shirkadu siiso mid ka mid ah mulkiilayaasha ama asaasayaasha.
 - j. Dhammaan wixii lacag caddaan ah oo uu siiyo loo shaqeeyuhu shaqaalahiisa sida abaal marin, dhiirigalin ama wixii la mid ah.
 - x. Kirada guriga ama baabuurka lacag caddaan ah loo shaqeeyaha u siiyo shaqaale, waxaa loo cashuurayaa gunno ahaan waxaa la waafajinyaa Qodobka 21-aad ee xeerkan.
- Kh. Ammaahda ama maalgelinta islaamiga ah oo loo shaqeeyuhu ka bixiyey shaqaalaha oo uu shaqaaluhu bixin lahaa bisha daynta la helay.



Qodobka 26-aad
Hawl-gabka Iyo Taakulooyinka

1. Hawl-gabka, liiltirka iyo taakulooyinka laga reebayo shaqaalaha waxaa lagu qiimaynayaa lacagta guud ee mushaarkooda.
2. Shaqaalaha waxaa laga reebayaa qiimaha lagu caddeeyey Shaxda 3.9 ee Dakhliga Taakulooyinka, kuwaasoo lagu horumarinayo shaqaalaha iyo shaqada.

Qodobka 27-aad
Cashuurta Dakhliga Shaqaalaha Xoogsatadda ah (Casual Labour)

1. Shaqaalaha xoogsatadda ah ee maalinlaha u qaata dakhligooda, kana shaqeeya farsamadda iyo hawl maalmeedka, waxaa ku waajibaya cashuurta shaqaalaha xoogsatadda ee qiimahooda lagu caddeeyey shaxda 3.11 ee cashuurta Dakhliga xoogsatadda ah.
2. Shaqooyinka la xiriira dhismaha ama la yaqaano qiyaasta qoondada geleysa gacanta (Labour), maamulka dhismahu waa in uu marka la bilaabay shaqada u soo gudbiyo maamulka dakhliga, wadarta cashuurta xoogsatada ku waajibtay, iyadoo uu bixinayo ka hor dhismaha inta uusan bilaabin.
3. Haddii shaqaalaha xoogsataddu yihiin kuwa bille ugu shaqeeya shirkada ama qofka, waxaa loo tix-gelinayaa cashuurta dakhliga shaqaalaha si waafaqsan qodobka 21-aad ee xeerkan.

Qodobka 28-aad
Cashuurta Guddiyadda Sare

Gunno hawleed loo qoondeeyey xubnaha guddiga maamulka (Board of Directors) kuwa joogta ah (Executive) iyo kuwa aan joogtadda ahayn (Non-Executive) waxaa lagu cashuurayaa qiimaha lagu caddeeyey Shaxda 3.11 ee Gunno sharafeedka Guddiyada Sare ee Maamulka.

Qodobka 29-aad
Qaabka Bixinta Cashuurta dakhliga Shaqada

1. Cashuurta dakhliga shaqada waxaa loo bixin karaa bille ama saddex biloodle, waxayna ku xiran tahay heshiiska ka dhaxeeya shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha.



2. Caddaynta cashuur bixiyaha uu soo gudbinayo waa in ay tahay qoraal ay ku qoran tahay lambarka aqoonsiga cashuur bixinta shaqaalaha, magaciisa, taleefankiisa iyo nooca dakhliga soo gala iyo cadadka cashuurta laga reebay waana in ay la socotaa heshiiska shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha cashuurta ugu horaysa ee shaqaalaha laga reebayo ama bixinayo.
3. Cid kasta oo bixinaysa cashuurta dakhliga waa in ay kusoo wargaliyaan maamulka dakhliga, xilliga caddaynta cashuurta dakhliga shaqada, isbedel kasta oo ku dhaca dakhliga shaqada ama xuquuq kasta sida mushaar dhimid, mushaar kordhin, dalacaad, abaalmarino lacageed, gunno dheeri ah, shaqaale cusub, shaqaale shaqada ka baxay ama noocyadda fasaxyadda.
4. Hab xisaabeedka dakhliga shaqada waxaa loo raacayaa si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 30-aad
Cashuurta Dakhliga Kiraynta

Cashuurta dakhliga kiraynta waxaa laga qaadayaa kirooyinka uu cid kasta ka hesho hanti guurto ama ma guurta ah. Shirkaduhu waxay kusoo caddaynayaan dakhliyada ay ka helaan kirooyinka si waafaqsan Qodobka 53-aad ee xeerkan.

Qodobka 31-aad
Dakhliga Kiraynta Hantida

Cashuurta dakhliga kirada waxay ku waajibtay dakhliga ka soo gala kirada ee baabuurta, dhulka, dhismayaasha iyo dhammaan qalabyada kale ee kiro gali kara.

Qodobka 32-aad
Dakhliga Kiraynta Laga Dhaafay Cashuurta.

1. Goobaha loogu tala galay cibaadaysiga.
2. Xarumaha qabuuraha.
3. Xarumaha ama dhismayaasha Dawladu leedahay.
4. Deegaanka ama dhismayaasha safaaradaha iyo qunsuliyadaha Dawladdahoodu iska leeyihiin ee ku yaala gudaha Dawladda Puntland.
5. Guryaha ay leeyihiin Qaramada Midoobay iyo wakaaladahooda gaarka ah.



Qodobka 33-aad
Cashuurta Dakhliga Kiraynta

1. Heshiiska kirooyinka waa in ay ahaadaan qoraal ay wada saxiixeen dhinacyada heshiiska wada galay soona maray nootaayo sharci ah. Nuqul kamid ah heshiiskaas waa in loo gudbiyaa maamulka dakhliga shan iyo toban (15) maalmood gudahooda.
2. Kirada waxaa loo bixin karaa bille, saddex biloodle, lix biloodle ama sannadle waxayna ku xiran tahay heshiiska ka dhaxeeya kiraalaha iyo mulkiilaha.
3. Hab xisaabeedka dakhliga kiraynta waxaa loo raacayaa si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 34-aad
Xisaabinta Faa'iidada Ganacsiga

1. Faa'iidooyinka ganacsiga waxaa lagu go'aaminayaa dakhliga guud ee ka soo gala dhammaan dhaq-dhaqaaqyada ganacsiga sida maalgashiga (Investment), qandraasyada, macaashka lahaanshaha (Royalties) iyo dhammaan hawlaha macaash abuurka leh oo laga jaray dhammaan kharashyada lagu galay ganacsiga.
2. Iyadoo la raacayo xisaab xirka faa'iidada ama khasaaraha shirkada ee ka horaysa cashuurta (Profit/loss Before Tax), waxaa dib loogu darayaa dhammaan kharashaadka aan la ogolayn ee lagu caddeeyey qodobka 39-aad ee xeerkan, waxaana laga jarayaa (deduct) kharashaadka loo oggol yahay ee lagu caddeeyey qodobka 39-aad ee xeerkan.
3. Faa'iidooyinka ganacsiga waxaa lagu go'aaminayaa xilli cashuureed kasta, iyadoo lagu saleynayo xisaab xirka sannadka faa'iidada ama khasaaraha hab waafaqsan qaabaysanaha (Form) caddeynta faa'iidadda ganacsiga ee maamulka dakhliga.
4. Maamulka dakhliga wuxuu isticmaali karaa hab kasta oo kale oo xisaabin ah ama ilo kale oo macluumaad si waafaqsan xeerkan, si loo hubiyo toosnaanta faa'iidada cashuur bixiyaha uu soo gudbisaday.

Qodobka 35-aad
Faa'iidada Cashuurta Ku Salaysan Qiyaasta

1. Cashuur bixiyaasha ku xusan qodobka 21-aad farqadihiisa 3-aad iyo 4-aad ee xeerkan, marka la xisaabinayo cashuurta macaashka, waxaa lagu caddaynayaa qaabaysanaha



(Form) qiimaynta cashuurta ee qiyaasta dakhliga (Presumptive Income Tax), iyadoo la waafajinyo habraaca cashuurta qiyaasta ee maamulka dakhliga.

2. Cashuurta qiyaasta waxaa loo bixinayaa bille ama saddex biloodle, ugu dambayn maalinta 10-aad ee bil walba ama bisha ay ku egtahay saddexda biloodka. Ciddii ku guuldaraysata in ay bixin wayso cashuurta ku waajibtay waxaa laga qaadayaa ganaaxyadda lagu caddeeyey qodobka 111-aad ee xeerkan.

Qodobka 36-aad

Ka Macaashida Hantida Ku Jirta Lacagta Qalaad

Inta lagu jiro gabagabada xilliga cashuurta, waxaa lagu qiimaynayaa sarrifka maalinta uu dhacay dhaqdhaqaaqu, iyadoo faa'iidooyinka ama khasaaraha ka dhashay lagu darayo qiimeynta faa'idada ganacsiga muddadaas.

Qodobka 37-aad

Xisaabinta Macaashka Ganacsi Ee Ku

Xiran Qandaraas Muddo Dheer

1. Faa'iidooyinka ganacsi ee la xiriira qandaraaska muddada dheer, waxaa lagu saleynayaa boqolleyda waxqabad ee la dhammaystiray xilli cashuureed kasta ka dib qiimaynta maamulka dakhliga.
2. Boqolleyda hawlaha la dhammaystiray xilli cashuureed kasta, waxaa lagu go'aaminayaa marka la isbar-bardhigo wadarta kharashyada loo qoondeeyay ee heshiiska iyo kharashka dhabta ah ee la galay sannadkan si waafaqsan qodobka 39-aad ee xeerkan.
3. Macaashka faa'idada la cashuuri karo waxaa lagu helayaa qiimaha boqolayda ee ku xusan farqadda 1-aad ee qodobkan.

Qodobka 38-aad

Kharashaadka La Oggol yahay In Laga Gooyo

Dakhliga La Cashuuri Karo

Marka la go'aaminayo faa'iidooyinka dhaq-dhaqaaqyada ganacsiga, kharashaadka laga jarayo dakhliga la cashuuri karo waa kuwa soo socda: -

- 1- Waa in loo galay ujeedo saamaysa ganacsiga oo kaliya, faah-faahintoodana maamulka dakhliga ku soo saari doona habraac u gaara.
- 2- Wax iibsi kasta oo loo soo gatay in dib looga ganacsado (Inventory).



- 3- Qiima dhac ku yimaada hantida saafiga ah ee ganacsiga ee lagu xisaabiyey, si waafaqsan qodobka 41-aad ee xeerkan.
- 4- Ajuurooyinka Dawladda ee uu bixiyey sannad cashuureedkaas marka laga reebo kuwa lagu sheegay qodobka 43-aad ee xeerkan.
- 5- Tababarradda, cilmi baarista iyo waxbarashadda loo sameeyo shaqaalaha shirkada.
- 6- Taakulada caafimaadka ee shaqaalaha la siiyo.
- 7- Deynta xumaatay ee buuxisay shuruudaha Qodobka 43-aad ee xeerkan.

Qodobka 39-aad

Kharashyada Aan Laga Goyn Karin

Dakhliga La Cashuuri Karo

Kharashyada soo socda lagama jari karo dakhliga la cashuuri karo: -

1. Saami-qaybsiga lagu dhawaaqay ee macaashkii la siiyay saamilayda.
2. Gunnooyinka loo keydiyey shaqaalaha si loo siiyo mustaqbalka.
3. Ganaaxyadda cashuuraha iyo ciqaabaha la mid ah.
4. Qiima dhaca hantida ee shirkadaha soo gudbisadaan.
5. Taburacaadka loo kaydiyey deeqaha la siiyo ururrada aan macaash doonka ahayn (non-profit organizations) oo aan qiimihiisu dhaafin boqolkiiba hal (1%) faa'iidada guud.
6. Cashuurta ka reebidda uu ka sameeyey shaqaalaha ama cashuur bixiye kale iyo cashuurta Gadista (Sales tax).
7. Kharashaadka isticmaalka qof ahaaneed.
8. Kharashaadka madadaalada ee shaqaalaha ee aan la xiriirin arrimaha shaqada
9. Kharaashadka guud ee ka dhaxeeya ganacsiyo kale duwan (Overhead cost) oo aan la kale saari Karin kana badan Boqolkiiba labaatan (20%) faa'iidada guud.
10. Iibsiga hantida Cimriga Dheer (Non-Current Asset).
11. Kharashaadka lagu bixiyo arrimaha maamulka, adeegyada farsamada iyo khidmadaha lahaanshaha (Royalty) oo la siiyo cid aan deganayn Puntland oo ka badan boqolkiiba laba (2%) faa'iidada guud ee wareejinta cashuur bixiyaha.

Qodobka 40-aad

Qiima Dhaca (Depreciation)

1. Qiima dhaca hantida wuxuu ku xiran yahay isbedalka dhinnaanshe (diminishing) ee ku dhacay iibsigii asalka ahaa iyo wixii kordhin lagu sameeyey hantida (Capital expenditure).



2. Hantida ku qiimaysan nidaamka isku xirka ah (Pooling), sicir dhimistoodu waa qiimaha shayga ee ku cad xisaab xirka dheelitirka (Financial Position) ee bilowga xilliga cashuurta.
 - b. Wixii kordhin lagu sameeyey (Capital expenditure) hantida ku qiimaysan nidaamka isku xirka ah ee xiliga cashuurta waxay kordhinaysaa qiimaha asalka ahaa.
 - t. Waxaa hoos u dhacay qiimaha lagu iibiyey hantida ama caymis (Insurance) laga helay hantida ku luntay masiibooyin dabiici ah ama bedelid kale ee muddada cashuurta.
3. Haddii sicir dhimista ama qiimaha asalka ah yahay (\$2,000) iyo wixii ka yar, qiima dhaca oo dhan waxaa loo arkaa inuu yahay kharash laga jari karo sannad cashuureedkaas.

Qodobka 41-aad

Qiima-Dhaca Hantida

1. Qiimo dhaca hantida guurta iyo maguurtada ah ee ganacsiga waxaa laga jarayaa dakhliga la cashuuri karo.
2. Dhismayaasha, qalabka warshadaha culus iyo makiinadaha ayaa sannad walba qiimo dhimis lagu samaynayaa, mid walbana goonidiis waxaa lagu saleynayaa heerka qiima dhacooda ee u dhigma Qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.12 ee qiima dhaca hantida.
3. Hantida dahsoon (intangible Asset) oo ay ka mid yihiin sumcadda wanaagsan (Goodwill) ee laga soo iibsado gacan saddexaad (Third Party), ayaa sannad walba la qiimeynayaa, iyadoo lagu saleynayo heerka qiima dhaca ee lagu cadeeyey Shaxda 3.12 ee Qiima dhaca Hantida.
4. Qalabka is-gaarsiinta ee noloshoodu ka badan tahay toban (10) sano ayaa sannad walba la qiimeynayaa, iyadoo lagu saleynayo heerka qiima dhaca Qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.12 ee qiima dhaca hantida.
5. Hantida ku jirta labada qaybood ee soo socda ayaa lagu qiimaynayaa nidaamka isku xirka (Pooling System) laguna salaynayo qiimayaasha soo socda.
6. Kombiyuutarrada, qalabyada iyo hababka isgaarsiinta ee noloshoodu ka yar tahay toban (10) sano, qiima dhacoodu wuxuu noqonayaa qiimaha lagu cadeeyey shaxda 3.12 ee qiima dhaca hantida.
7. Hanti kasta oo ganacsi ee noloshoodu ka yar tahay toban (10) sano qiima dhacooda waxaa uu noqonaya Qiimaha lagu cadeeyey Shaxda 3.12 ee qiima dhaca hantida.



8. Hoos u dhaca ku yimaada hantida kiraysan waqtiga dheer (leased asset), waxaa loo oggol yahay kiraystaha in loo qiimeeyo qiima dhaca hantida muddada uu isticmaalayo. Qiimaha asalka ah waxaa u dhigmaya qiimaha guud ee kiradda, si loo hubiyo jiritaanka kirada hantida waa in caddaymaha heshiiska lala soo wadaagaa maamulka dakhliga.
9. Dhulka, farshaxanka, waxyaalaha qadiimiga ah, dahabka iyo wixii kale ee hanti ah ee aan gabow lahayn lama qiimaynayo.

Qodobka 42-aad

Kharashaadka Tababarrada Iyo Cilmibaarista

1. Inta lagu jiro xilliga cashuuraha, dhammaan kharashyada tababarka iyo cilmi baarista ee uu bixiyo cashuur bixiye kuna dhiirrigeliyo howlaha ganacsiga, waxaa loo tix-galinayaa kuwa laga jari karo dakhliga la cashuurayo si waafaqsan qodobka 38-aad ee xeerkan.
2. Kharashaadka ku baxa tababarka iyo cilmi -baarista ee kor u qaadida hawlaha ganacsiga, kuma jiraan dib u habaynta, dayactirka, sahminta iyo iibsashadda hantida ma guurtadda ah sida dhulka, dhismayaasha iyo hanti kasta oo maguurta ah.

Qodobka 43-aad

Deyn Xumaatay (Bad debt)

1. Go'aaminta faa'iidadda ganacsiga waxaa loo oggol yahay in laga jaro deymaha xumaaday haddii shuruudaha soo socda ay buuxiyaan: -
 - b. Haddii qaddar u dhiganta deynta hore loogu daray dakhliga cashuur bixiyaha.
 - t. Haddii deynta laga saaray buugaagta xisaabaadka cashuur bixiyaha.
 - j. Haddii cashuur bixiyuhu qaaday dhammaan tallaabooyinka suurtoogalka ah ee dabagalka lacag bixinta sida go'aan maxkamadeed oo tusaya ka xayuubinta deynta.
2. Cid kasta deyntiisu ay ka yar tahay (\$10,000) oo dollar ah, marka loo tixraaco xaaladaha lagu tilmaamay xarfaha (b) iyo (t) ee Faqradda Koowaad ee qodobkan, cashuur bixiyuhu waa inuu keenaa caddayn ah inuu qaaday tallaabooyin macquula oo ku siman muddo saddex (3) sano ah si loo soo celiyo deynta.
3. Faa'iidadda ganacsiga waxaa lagu kordhinayaa dhammaan lacagta laga soo ceshay deymaha xumaaday ee laga jaray.



Qodobka 44-aad

Khasaare wali taagan (Loss Carried Forward)

1. Haddii xisaabinta macaashka ganacsigu uu keeno khasaare muddada cashuurta, khasaarahaas waxaa laga jarayaa faa'iidada ganacsiga ee saddexda sano oo ku xigta sannadka khasaaraha la galay, waxaana la tixgalinayaa khasaarahii hore haddii khasaare ka danbeeya la galo.
2. Khasaaraha shirkadu ku gasho ganacsi ka baxsan gudaha Puntland lagama jarayo faa'iidada ganacsiga loomana tix-galinayo.

Qodobka 45-aad

Qiimaynta Kala Wareejinta Sicirka Ee shirkadaha Xirirka Leh (Transfer Pricing Between Related Companies)

1. Cashuur bixiyaasha isla xiriira ee ku lug leh macaamil dhexdooda ah, waa inay haystaan dukumentiyada caddaynaya heshiiska xiriirkooda.
2. Haddii sidaas la yeeli waayo, maamulka dakhligu wuxuu jaan goynayaa sicirka wax kala iibsiga si waafaqsan xeerarka guud ee sicir beddelidda, waxaana lagu soo saari doona habraac u gaar ah.

Qodobka 46-aad

Dakhli Maaliyadeedka (Financial Income)

1. Dakhliga maaliyadeed waxaa kamid ah:
 - b. Dakhliga faa'iidada maalgashiga islaamiga ah.
 - t. Dakhliga dulsaarka deynta.
 - j. Dakhliga kaydsga.
 - x. Dakhliga dammaanadaha.
- Kh. Dakhliga ka soo xarooda dammaanadaha Dawladda (*Government Securities*), dakhliga ka soo xarooda Dhigaalka (Income from Bonds), dammaanadaha gorgortanka ah ee ay Dawladdu soo saarto (Negotiable Security), dammaanadaha ay bixiyaan shirkadaha dadweynaha (Public Companies) iyo kuwa gaarka loo leeyahay (Private Companies), iyo weliba dakhliga ka soo xarooda dammaanadaha lacagta caddaanka ah.



2. Dhammaan dakhliyadda maaliyadeed ee lagu sheegay farqadda koowaad ee qodobkan, waxaa lagu cadayn doona dakhliga sannadka.

Qodobka 47-aad

Dakhliga Macaashka Lahaanshaha (Royalty Income)

1. Dakhliga macaashka lahaanshaha waxaa ka mid ah dhammaan lacagaha laga helo bixinta adeegyadda soo socda: -
- b. Isticmaal ama xaqa isticmaalka
 - t. Xuquuqada ikhtiraac nashqad.
 - J. Calaamad ganacsi.
 - x. Qorshe qaacido.
 - kh. Xuquuqda daabacaadda suugaanta.
 - d. Farsamada gacanta.
 - r. Shaqada sayniska oo ay ku jiraan filimada shaneemada.
 - s. Cajaladaha loo isticmaalo baahinta raadiyaha ama telefishanka.
 - sh. Qiimaha adeegsiga, ama xaqqa isticmaalka qalabka warshadaha, ganacsiga sayniska ama isticmaalka macluumaadka khuseeya aqoonta warshadaha, ganacsiga ama sayniska.
2. Dhammaan Dakhliyadda macaashka lahaanshaha ee lagu sheegay farqadda koowaad ee qodobkan, waxaa lagu caddayn doona dakhliga sannadka.
3. Isticmaalka khayraadka dabiiciga ah ee wadanka, sida khayraadka laga helo badda, macdanta iyo waxyaabaha dhulka laga qodo, geedaha dabiiciga oo mirahooda ama xabagtooda la dhoofiyo, shidaalka iyo wixii la xariira ee laga soo saaro gudaha Puntland waxaa ku waajibaysa cashuurta macaashka lahaanshaha oo qiimaheeda lagu caddeeyey shaxda 3.13 cashuurta macaashka lahaanshaha ee khayraadka dabiiciga ah, qaabka loo qaadayo cashuurtan waxaa habraac u gaara kasoo saarayaa maamulka dakhliga.

CUTUBKA 4-aad

CASHUURTA DAKHLIGA SHIRKADAH (Corporate Income Tax)

Qodobka 48-aad

Cashuurta Dakhliga Shirkadaha

Cashuurta dakhliga shirkadaha waxaa laga qaadayaa faa'iidadda ganacsiga ee ay helaan shirkaduhu sannad cashuureed kasta.



Qodobka 49-aad
Cashuur Bixiyeyaasha Ku Waajibtay Cashuurta Dakhliga
Shirkadaha

1. Shirkadaha soo socda waxaa ku waajibay cashuurta macaashka ganacsigooda
 - b. Shirkadaha ku dhisan sharciyada Puntland ama Soomaaliya ama wadan kale ee dakhli kasoo galo gudaha Puntland.
 - t. Bulshada iskaashatadda ah iyo laamahooda.
 - J. Xarumaha guud ee ganacsiga (Co-orporative).
 - x. Ganacsiga wadaagga ah (Partnerships).
 - kh Ganacsiyada kale ee u abuuran in ay sameeyaan macaash.
2. Shirkadaha lagu caddeeyey farqadda 1-aad ee qodobkan waxaa loo aqoonsanayaa in ay dhammaan hawlhooda ganacsi ka helaan dakhli.
3. Shirkadaha ku dhisan qaab wadajira (Groups) oo qaanuuni ah, shirkad walba waxay gaar u caddaynaysaa cashuurta faa'iidada sannadka iyo dhammaan cashuuraha kale ee ku waajibay si kala madax-bannaan.

Qodobka 50-aad
Shirkadaha Laga Dhaafay Cashuurta Dakhliga

1. Cashuurta Dakhliga kuma waajibayso shirkadaha soo socda: -
 - b. Hay'adaha dawladda ee aan faa'iido wadaaga la ahayn shirkad kale.
 - t. Hay'adaha ka shaqeeya kaalmadda bulshada ee Dawladda u diiwaan-gashan.
 - j. Hay'adaha sanduuqyada horumarinta ee Dawladdu aqoonsantahay.
 - x. Hay'adaha ama ururradda aan macaash doonka ahayn (Non-Profit Organizations).
2. Hay'adaha laga dhaafay cashuurta dakhliga, waxa looga baahan yahay in ay usoo gudbiyaan maamulka dakhligu xisaab xirkooda ugu dambayn 31 Maarso ka dib xilliga cashuurta.

Qodobka 51-aad
Baaxadda Mas'uuliyadda Cashuurta Dakhliga Shirkadaha

1. Hay'adaha degan gudaha Puntland waxay mas'uul ka yihiin cashuurta faa'iidada ganacsiga ee xilli cashuureedka sannadka.



2. Hay'adaha aan deganayn waxay mas'uul ka yihiin cashuurta faa'iidada ganacsi ee dakhliga kasoo gala gudaha Puntland sannad cashuureed kasta.

Qodobka 52-aad

Qiimaha Laga Cashuurayo

Faa'iidada ganacsiga ee la cashuuri karo waa Qiimaha ku cad shaxda 4.1 ee Cashuurta Macaashka Shirkadaha.

Qodobka 53-aad

Qaabka Cashuurta Dakhliga Shirkadaha (Corporate Income Taxation)

1. Faa'iidada Shirkadaha waxaa loo xisaabinayaa si waafaqsan qodobadda cutubka 3-aad ee xeerkan.
2. Shirkadaha yar-yar waxay bixinayaan cashuurta qiyaasta ee cadadkeeda lagu tilmaamay shaxda 3.2 ee Cashuurta Qiyaasta Dakhliga.

Qodobka 54-aad

Shirkadaha Wadaagga Dawladda Iyo Dadka (Public Private Partnership)

Waxaa loo cashuurayaa sida shirkadaha gaarka loo leeyahay, waxaana dhammaan la marsiinayaa habraacyada xeerkan, Dawladdu waxay dib u sheeganaysaa macaashka saamiga (*dividends*) ee sannadka, iyadoo dakhli ahaan loogu xeraynayo.

Qodobka 55-aad

Cashuurta Dakhliga Ka Soo Gala Kirada Hantida Guurtada Iyo Ma Guurtada Ah

1. Dakhliga kirada hantida ma guurtada ah iyo guurtada ah ee lagu daray hantida Shirkadaha, taasoo ay ku waajibtay cashuurta dakhliga, waxaa lagu mideynayaa wadarta dakhliga ee la cashuuri karo.
2. Haddii si gaara shirkadu u bixiso dakhliga kirooyinka si waafaqsan xeerkan shirkadu waxay gaar u caddaynaysaa dakhliga kirooyinkaas kumana daryso dakhliga shirkada ee la cashuurayo.



3. Haddii shirkadu ay tahay mid ka macaashta arrimaha kirooyinka, dakhliga kasoo gala kirooyinka waxay kusoo gudbinaysaa caddaynta sannadka sida waafaqsan xeerkan.

Qodobka 56-aad

Dib-U-Habaynta Shirkada

Shirkaduhu waxay ku khasban yihiin inay dib u habayn u sameeyaan sida soo socota: -

1. Isku darka labo ama in ka badan oo ah shirkado degan gudaha Puntland oo isku noqday shirkad gaar ah.
2. La wareegidda boqolkiiba konton (50%) ama in ka badan ee saamiyada ama xuquuqda cod bixinta, tiro ahaan ama qiime ee shirkad deggan Puntland.
3. Lahaanshaha boqolkiiba konton (50%) ama in ka badan hantida iyo deymaha shirkad degan Puntland oo loo wareejiyo shirkad kale oo deggan gudaha Puntland.
4. La wareegidda hantida shirkada oo dhan si jiritaankeeda loogu beddelo shirkad kale.
5. U qaybinta shirkad degan Puntland laba ama in ka badan oo shirkadood.

Qodobka 57-aad

Cashuuraha Shirkadaha Dib U Habaynta Lagu Sameeyey

1. Haddii ay dhacdo dib u habayn lagu sameeyey shirkadaha, shirkada wareejinaysa waa laga dhaafayaa cashuurta marka la qiimeeyo faa'iidada raasumaalka iyo khasaaraha ka soo gaaray dib-u-qaabaynta.
2. Shirkada la wareegtay lahaanshaha shirkad kale, waxay qiimaynaysaa hantida iyo deymaha ku lugta leh qiimaha asalka ah shirkada hore.
3. Shirkada la wareegtay waa in ay kusoo dartaa caddaynta sannad cashuureedka dhammaan xogta ganacsiyada ay la wareegtay.

Qodobka 58-aad

Cashuurta Shirkad Kacday (Musaliftay)

1. Shirkadaha kacay, kadib bixinta deymaha iyo qaybinta hantida hartay, mulkiilayaashii shirkada kacay waa in ay soo gudbiyaan warbixinta xisaab xirkii ugu dambeeyey ee shirkada, wixii cashuur lagu leeyahay waxay qayb ka yihiin daymaha ay bixiyaan.
2. Cid kasta oo hawlo ganacsi ka wada gudaha Puntland ahna cashuur bixiye ka diiwaan-gashan maamulka dakhliga, waxaa waajib ku ah in muddo laba isbuuc ah ogaysiin ku soo siiyo maamulka dakhliga haduu musalifo ama xirayo ganacsigiisa.



CUTUBKA 5-aad
CASHUURTA DHEEFTA HANTIDA (CAPITAL GAIN TAX)

Qodobka 59-aad

Cashuurta Dheefta Hantida

Cashuurta dheefta Hantida waxay ku waajibtay cid kasta oo hantida iska iibinaysa ama iska wareejinaysa sida hibo la siinayo qof kale marka laga reebo lammaanaha isqaba hantida ay isku wareejiyaan.

Qodobka 60- aad

Hantida Ay Ku Waajibtay Cashuurta
Dheefta Hantida

Wareejinta ama iska iibinta hantida sida; -

1. Saamiyada (Shares).
2. Hantida Ma guurtadda ah.

Qodobka 61-aad

Hantida Laga Dhaafay
Cashuurta Dheefta Hantida.

- 1- Hantida Guurtada ah.
- 2- Hantida Dhaxalka ku kala wareegta.
- 3- Wareejinta Saamiga Shirkada wax ka badan 50%.
- 4- Hantida Dahsoon (Intangible Asset),

Qodobka 62-aad

Qaabka Xisaabinta Cashuurta Dheefta Hantida

- 1- Waxaa la cashuurayaa dheefta hantida farqiga u dhexeeya.
 - b. Qiimaha lagu iibiyey hantida ama qiimaha u dhigma oo ay ka joogto suuqa xilligaas.
 - t. Qiimaha asalka ah ee lagu soo iibsaday hantida ama qiimaha hantida ay joogtay taban (10) sano ka hor xilliga iibinta haddii hantida ay jirto muddo toban (10) sano ka badan.
 - j. Wixii horumarin hantiyadeed ee muuqda oo lagu sameeyey hantida iyo kharaashka ku baxay in uu iibku dhaco sida dulaalka iyo sharciyadda oo caddayn leh bixinteeda.



2. Khasaaraha ka dhasha iibka hantida waxaa khasaaraha lagu gudi doona dheefaha mustaqbalka muddo saddex (3) sano, oo ka danbaysa xilliga khasaaraha.

Qodobka 63-aad

Caddaynta Iyo Bixinta Cashuurta Dheefta Hantida.

- 1- Shirkadaha waxay soo raacinayaan Cashuur Sannadeedka.
- 2- Qofka kaliya waxaa uu ku bixinayaa
 - b. Saamiyada waxaa looga reebayaa shirkada uu ka dhacay kala wareejinta saamiga ama nootaayada kala qortay kala wareejinta sida lagu caddeeyey qodobka 65-aad farqadiisa 5-aad ee xeerkan.
 - t. Hantida ma guurta ah waxaa cashuurta la bixinayaa marka hantida la kala wareejinayo oo heshiiska nootaayadda ka hor waa in la bixiyaa cashuurta ku waajibtay.
3. Kadib xisaabinta cashuurta dheefta waxaa ku waajibaysa cashuurta qiimaheeda lagu caddeeyey Shaxda 5.1 ee cashuurta dheefta hantida.

CUTUBKA 6-aad

CASHUUR KA REEBID (WITHHOLDING TAX)

Qodobka 64-aad

Cashuur Ka Reebidda

Cashuur ka reebidda waa cashuur ay reebayaan cid kasta oo lagu caddeeyey lifaaqa koowaad ee xeerkan, waxaa loo diiwaan-galinayaa cashuurtaas cida laga reebay inay bixisay.

Qodobka 65-aad

Cashuur Ka Reebidda Cashuuraha Qofka

1. Loo shaqeeya kasta waa in uu ka reebaa cashuurta dakhliga shaqada shaqaalihiiisa, wuxuuna u bixinayaa cashuurta si waafaqsan ee xeerkan.
2. Cid kasta oo ay u kiraysan yihiin guryo ama gaadiid, waxay ka reebayaan cashuurta ku waajibtay dakhliga kiradda ee mulkiilaha si waafaqsan ee xeerkan.
3. Shirkadu marka ay qaybinayso macaashka saamiga sannadka waxay ka reebayaan cashuurta macaashka saamiga si waafaqsan qodobada 21-aad (7), ee xeerkan, waxayna



usoo gudbinayaan maamulka dakhliga, iyagoo kusoo lifaaqaya caddaynta macaashka shirkada.

4. Shirkadu marka ay bixinayso gunnooyinka guddiyadda sare waa in ay ka reebtaa cashuurta ku waajibaysa si waafaqsan qodobka 28-aad ee xeerkan.
5. Cashuurta dheefta hantida ee saamiyada iyo kala wareejinta hantida qofka kaliya ah waxaa laga reebayaa cashuurta ku waajibtay si waafaqsan ee xeerkan.

Qodobka 66-aad

Cashuurta Ka Reebidda Cid kasta oo Ma Deggane Ah.

1. Shaqsiyaadka aan degenayn dalka kana diiwaan-gashaynayn maamulka dakhliga, oo shaqo waqti gaaban ah ka fulinaya gudaha Puntland, waxaa loo shaqeeyuhu ka reebayaa cashuurta ku waajibay markasta, sida ku cad Shaxda 6.1 ee cashuur ka reebidda ma degganayaasha.
2. Waqtiga gaaban waxaa loo aqoonsanayaa ugu badnaan 30 casho, haddii uu muddo intaas ka badan ka shaqaynayaan gudaha Puntland waa in uu haystaa warqadda ruqsadda shaqada.
3. Dakhliga macaashka lahaanshaha la siiyo shirkadaha ama shaqsiyaadka wadanka aan daganayn oo aan samayn caddaynta cashuurta sannadka, waxaa laga qaadaya dakhligaas qiimaha lagu caddeeyey Shaxda 6.2 Cashuur ka reebidda macaashka lahaanshaha ma deggane.
4. Qofka ma deganaha ah marka uu wadanka ka baxayo waa in uu haystaa waraaqda caddaynta cashuur bixiyaha ee uu bixiyo maamulka dakhliga.

Qodobka 67-aad

Cashuurta Qofka aan Loo Samayn Cashuur Ka Reebid

Marka hay'adu aysan mas'uuliyad ka saarnayn cashuur ka reebid, si waafaqsan heshiisyada caalamiga ah, mas'uuliyadda bixinta cashuurta waxaa laga rabaa cid kasta oo dakhli kasoo galo adeegyada ama hawlo ay u qabtaan hay'addaas ka bixiyaan cashuuraha ku waajibay si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 68-aad

Cashuur Ka Reebidda Alaabta Ganacsiga ah ee La Soo Dajiyo

1. Soo dajiye kasta waxaa ku waajibaya in uu bixiyo cashuur ka reebidda dakhliga ee lagu caddeeyey Shaxda 6.3 Cashuur ka reebidda soo dajiyaasha, iyadoo lagu qiimayey wadarta



guud ee cashuurta ka dhalatay furdadda iyo cashuurta iibka, ka hor inta aan alaabta laga sii dayn furdada.

2. Cashuur haynta lagu sheegay farqada 1-aad ee qodobkan waxaa laga jarayaa cashuurta dakhliga sannadka (*yearly Income Tax*) marka la samaynayo caddaynta dakhliga sannadlaha ah.

Qodobka 69-aad

Cashuur Ka Reebidda Qandaraasyadda

1. Qiimaha Qandaraasyada waxaa laga reebayaa qiimaha ku cad Shaxda 6.4 ee cashuur ka reebidda qandaraasyada, marka qandaraaska loo diiwaan-galinayo waxaa lacagtan lagu dari doona cashuurta diiwaan-galinta qandaraaska si waafaqsan qodobka 78-aad ee xeerkan.
2. Cashuurta laga reebay waxaa diiwaan gashan doonna maamulka dakhliga, iyadoo laga jarayo cashuurta dakhliga inta lagu jiro caddaynta cashuurta sannad dakhliyeedka.
3. Dhammaan qandaraasyada ay bixiyaan hay'adaha caalamiga ah, kuwa maxalliga ah iyo hay'adaha Dawladda waxaa cashuurta guud ee ku waajibtay qandaraaska, ka reebayaan shirkada ama shaqsiyaadka ku guulaysta qandaraaska.

Qodobka 70-aad

Wakhtiga La Caddaynayo lana bixinayo Cashuur Ka Reebidda

Cid kasta oo samaysa cashuur ka reebid waa in ay soo gudbiso caddaynta cashuureed, kuna bixisaa si waafaqsan nidaamka maamulka dakhliga muddo toban (10) maalmood gudahood ah kadib bisha la reebay cashuurtaa.

Qodobka 71-aad

Ku Guuldareysiga In La Reebo Cashuurta

Shirkada iyo shakhsiga laga rabo in uu cashuur reebo oo fulin waaya si waafaqsan xeerkan waxa ku waajibaya in uu bixiyo qadarka cashuurta ah ee aan la reebin oo ay ku weheliyaan ganaaxyadii ka dhashay la daahidda cashuurta, si waafaqsan xeerkan.



Qodobka 72-aad

Diiwaanka Lagu Hayo Cashuur Ka Reebidda

1. Cid kasta oo loo sameeyey cashuur ka reebid, waxaa diiwaanka lagu kaydinayo xogta cashuuraha u diyaarinaya maamulka dakhliga, middaas oo ay ku cadahay lacagaha laga reebay iyo dhammaan cashuur bixinnada uu sameeyey sannad cashuureedkaas.
2. Qof kasta oo cashuur bixiye ah, waa in uu haystaa xogta cashuurihiisa mudda dhan shan (5) sano.
3. Maamulka dakhliga, haddii uu wax uga baahdo cashuur bixiye kasta waa in uu lasoo wadaagaa dhammaan nuqulladda ay u baahdaa maamulka dakhliga.

CUTUBKA 7-aad

CASHUURTA DIIWAAN-GALINTA (Registration Tax)

Qodobka 73-aad

Cashuurta Diiwaan-gelinta

Cashuurta diiwaan-gelintu waxay ku waajibaysaa falalka iyo qoraallada ku xusan qodobka 74-aad ee xeerkan kuwaas lagu galo gudaha Puntland.

Qodobka 74-aad

Falalka Iyo Qoraallada Cashuurtu Ku Waajibayso

1. Cashuurta diiwaan-gelintu waxaa ay ku waajibaysaa qoraallada madaniga ah (civil acts) kuwa maamulka (Administration acts) iyo kuwa sharciga (judicial acts) sida
 - b. Heshiisyada.
 - t. Qaansheegadka kharashaadka dawladdu bixiso.
 - J. Baasaboorada.
 - x. Caddaymaha danbi la'aanta.
 - kh. Qandaraasyada.
 - d. Kala wareejinta hantida –guurtada ah iyo maguurtada.
 - r. Lahaanshaha raasumaalka asaaska shirkadaha (initial capital for company establishment).
 - s. Rahanka, cusbooneysiinta qoraallada.
 - sh. Tir-tirida rahanka.
 - dh. Qoraallada hibada, dhaxalka,



- c. Sumadda baabuurta.
- g. Beeraha
- f. Dhismayaasha cusub ama dayactirka lagu sameeyey.

Qodobka 75-aad

Diyaarinta Qoraallada

Qoraallada oo ah kuwa ku tilmaaman qodobka 74-aad ee xeerkan. Waxaa diyaarinaya Maxkamadaha, Nootaayooyinka sharciga ah iyo ciddii kale oo ay khusayso.

Qodobka 76-aad

Caddaynta Bixinta Cashuurta Diiwaan-galinta

1. Cashuurta diiwaan-galinta waa in la bixiyaa marka la helo oggaalaansha diiwaagelinta qoraalladda ku xusan qodobka 74-aad ee xeerkan.
2. Qofka ku guuldaraysta in uu soo caddeeyo cashuurta diiwaan-galinta oo aan soo ogaysiin xafiiska maamulka dakhliga ugu dhow, waxaa ku waajibi doona cashuurta lagu leeyahay iyo ganaaxyadda ku xusan qodobka 111-aad ee xeerkan

Qodobka 77-aad

Qoraallada Laga Dhaafay Cashuurta Diiwaan-gelinta

1. Heshiisyada Qaramada Midoobay ay la gasho Dawladda.
2. Qoraallada kale oo ay dawladdu xeer ama xeer gaar ahaaneed kaga deysay.

Qodobka 78-aad

Qiimaha La Cashuurayo Diiwaan-galinnadda

Qiimaha la cashuurayo Diiwaan-gelina waxaa loo raacayaa qiimaha dhabta ah sida lagu caddeeyey shaxda 7.1 ee cashuurta diiwaan-galinta.

Qodobka 79-aad

Cashuurta Diiwaan-galinta Kala Wareejinta Hantida

Cashuurtan waxay ku waajibtay cid kasta oo la wareegta hanti maguurta iyo guurta ah. Kala wareejinta waxay noqon kartaa kuwa soo socda midkood.

1. Hanti lagula soo wareego lacag.
2. Hanti laysu hibeeyo.
3. Hanti la kala dhaxlo.



4. Dhul marka u horeysa la diiwaan-galinayo.

Qodobka 80-aad

Qaabka Cashuurta Kala Wareejinnada

1. Kala wareejinnada, xaqa lahaanshaha hantida maguurtadda ama guurtada ah ee dhex marta laba dhinac, shuruudaha kale ee xeerku tilmaamayo ka sakow, waxaa looga baahan yahay warqadda caddaynta cashuurta ee ay bixiyaan maamulka dakhliga.
2. Nootaayaha, Maxkamadda iyo Garsooraha u idman u kala qoridda kala wareejinta waxaa ka reebban in ay kala wareejin sameeyaan, iyagoo aan helin warqadda caddaynta cashuurta ee farqada 1-aad ee qodobkan.
3. Hay'adaha dawladda iyo degmooyinka waxaa ka reebban inay u diiwaan-galiyaan muwaadin dhulkiisa ama hanti kale isagoon helin warqadda caddaynta cashuurta ee farqada 1-aad ee qodobkan.
4. Degmadii aan lahayn Nootaayo, Maxkamada ama Garsooraha qabanaya mas'uuliyaddaas waxaa u fulinaya maamulka degmaddaas.

Qodobka 81-aad

Hantida Laga Dhaafay Kala Wareejinnada

1. Kala wareejinta hanti maguurtadda ah ee ay sameeyaan hay'adaha garsoorku iyo kala wareejinnada dhex mara hay'adaha dawladda.
2. Kala wareejinta ay sameeyaan hay'adaha garsoorka waxaa loola jeeda kuwa ku yimaada go'aan Maxkamadeed.
3. Waxaa kaloo laga dhaafay dhammaan hay'adaha ku xusan qodobka 50-aad ee xeerkan.

Qodobka 82-aad

Taariikhda Caddaynta Cashuurta Dakhliga Hantida la kala Wareejiyo

Dakhliga kala wareejinta waxaa la xareynayaa waqtiga ay dhacday kala wareejintu sida lagu caddeeyey qodobka 80-aad ee xeerkan, lamana kala wareejin karo, hanti aan la cashuurin.



Qodobka 83-aad

Qiimaha La Cashuurayo Dakhliga Kala Wareejinadda Hantida

1. Lacagta lagu iibsaday hantida ma guurtada ama guurtadda ah, waxaa ku waajibaysaa qiimaha lagu caddeeyey shaxda 7.2 ee cashuurta diiwaan-galinta kala wareejinta hantida.
2. Kala wareejinta gaadiidka waxaa laga cashuurayaa diiwaan-galinta kala wareejinnada qiimaha lagu caddeeyey shaxda 7.3 ee cashuurta diiwaan-galinta kala wareejinta gaadiidka
3. Diiwaan-galinta hantida ma guurtada ah ee qofka isaga ugu horeeyey (dhulka), hibada ama dhaxalka waxaa lagu qiimaynayaa goobta ay ku taalo hantida, sida loo kala saarayo goobaha waxaa habraac ka soo saaraya maamulka dakhliga, waxaana la cashuurayaa qiimaha lagu caddeeyey shaxda 7.4 ee cashuurta diiwaan-galinta hantida ma guurtada ah ee hibada, dhaxalka iyo dhulka qofka ugu horeeyo lahaanshihiisa.

CUTUBKA 8-aad

CASHUURTA GADISTA

Qodobka 84-aad

Cashuurta Gadista

Cashuurta gadista waxaa ay ku waajibaysaa cidkasta oo isticmaashay adeegyada ama badeecadaha ganacsiga ee ku jira qodobka 85-aad ee xeerkan.

Qodobka 85-aad

Adeegyada Iyo Badeecadaha ay Ku Waajibayso

Cashuurta Gadista.

1. Cashuurta Gadista Badeecadaha
 - b. Keenidda badeecadaha ka yimaada wadanka dibadiisa, kana soo gala xuduudaha Puntland.
 - t. Badeecadaha loo gado jumlo ama tafaariiq.
 - J. Badeecadda ay soo saaraan warshadaha gudaha.
 - x. Badeecad kasta oo la dhalan rogo sida dib u farsamayn ama wax-ka-bedelid qaabkii asalka ahayd.
 - kh. Wax soo-saarka khayraadka dabiiciga ah ee wadanka.
 - d. Dhammaan badeeco ama adeegyo faa'iido doon ku jiro.



2. Cashuurta Gadista Adeegyada
 - b. Adeegyada korontadda iyo biyaha ee ay bixiyaan shirkaduhu.
 - t. Adeegyada isgaarsiinta kala duwan.
 - J. Adeegyada la kireeyo ama la rukunto si billa ah.
 - kh. Adeegyada nootaayooyinka iyo shirkadaha kala wareejinnada ka shaqeeya.
 - d. Adeegyada madbacadaha iyo daabacadda.
 - r. Qaansheegtadda hoteeladda ee cuntadda, jiifka iyo adeegyada kale ee la xiriira sida hoolalka loo isticmaalo shirarka & tababarrada.
 - s. Iibka tigidhada gaadiidka hawada, badda & dhulka.
 - sh. Iibka tigidhada ciyaaraha maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah.

Qodobka 86-aad

Fulinta Waajibaadka Cashuurta Gadista

1. Cashuurta gadistu waxay ku waajibaysaa marka badeeco soo degto, la iibinayo ama la gadanayo.
2. Cashuurta gadista waxaa lagu darayaa qiimaha qaansheegatada uu qaadanyo iibsadaha.
3. Cashuurta gadista ee ku waajibta soo dejinta waxaa lacag ahaan loola qaadayaa cashuurta furdadda.

Qodobka 87-aad

Adeegyadda Iyo Badeecadaha Laga

Dhaafay Cashuurta Gadista

Cashuurta gadista waxaa laga dhaafay:-

1. Badeecooyinka iyo qalabka uu keensado qof ama hay'ad laga dhaafay cashuurta furdada.
2. Badeecooyinka iyo qalabka si ku meel gaar ah loo soo dejiyey.
3. Wasiirka Wasaaradda wuxuu soo saari karaa xeer nidaamiye uu kaga dhaafayo si ku meel gaar ah cashuurta gadista badeecadaha qaarkood duruufo jira awgood.

Qodobka 88-aad

Qaabka Daabacadda Qaansheegadka

1. Ganacsaduhu waxaa waajib ku ah in uu adeeg walba ama badeeco marka uu iibinayo uu macmiilka siiyo caddaynta qaansheegadka.
2. Qaansheedka waxa looga baahan yahay.



- b. In qaybta sare ku taalo xogta ganacsiga.
 - t. Lambarka cashuurta bixinaya.
 - j. Faah-faahinta badeecadda la iibsanayo.
 - x. Qiimaha wadareed ee badeecadda.
3. Qaabka loo muujinayo cashuurta gadista waa:-
- b. Haddii ganacsaduhu leeyahay nidaamka danabaysan waa inuu ku daraa qaansheegadka uu daabacayo aaladda uu isticmaalayo.
 - t. Haduusan lahayn nidaamka danabaysan wuxuu qaansheegadka ugu darayaa qaab qoraal ah.
4. Xeerkani waxaa uu ku waajibanayaa dhammaan ganacsatadu in ay isticmaasho nidaam xisaabeed, si loogu daro cashuurta gadista qaansheegadka macmiilka.
5. Nooca nidaam xisaabeedka ay isticmaalayaan ganacsataddu waxaa lagu jaan goynayaa habraaca ay soo saarayaan maamulka cashuuruhu.
6. Shirkadaha daabacadaha waxa ku waajibaya in ay ku muujiyaan cashuurta gadista, buugta qaansheegtooyinka ay daabacayaan, kuna muujiyaan qiimaha ku cad Shaxda 8.1 ee cashuurta gadista.

Qodobka 89-aad

Sugidda Qiimaha La Cashuurayo

1. Ganacsatada bixisa adeegyada ama iibisa badeecadaha lagu xusay qodobka 85-aad ee xeerkan, maka laga reebo soo dajinta, waa in ay qaansheegato u sameeyaan badeecad kasta oo ay iibiyaan ama adeeg ay bixiyaan, hubiyaana qiimaha cashuurta gadista in si sax ah loo xisaabiyey looguna daray wadarta guud ee qaansheegtadda.
2. Ganacsatada lagu sheegay farqadda 1-aad ee qodobkan, waxaa waajib ku ah in ay maamulka dakhliga ugu diiwaangashan ayna helaan shahaadada oggolaanshaha cashuurta gadista, ganacsadihii qaada cashuurta gadista oggolaansho la'aan, waxaa tallaabo ka qaadaya maamulka dakhliga, waxaana ku waajibaya ganaaxyadda lagu caddeeyey qodobka 111-aad ee xeerkan.
3. Furdooyinku waa in ay kuaraan cashuurta gadista badeecadaha iyagoo ku salaynaya alaabta qiimaha soo socda midkood:-
 - b. Qiimaha furdadu siisay badeecadda ama qiimaha tacriifadda ku cashuurto Badeecadaha.



- t. Qiimaha alaabta la midka ihi ay ka joogto suuqa.
 - j. Qiimaha qaansheegadka uu ganacsaduhu kusoo iibsaday badeecadda uu soo dajiyey.
 - x. Saddexda qiima ee aynu soo sheegnay, waxaa la qaadanayaa midka ugu sarreeya sicir ahaan.
4. Wax-soo-saarka khayraadka dabiiciga ee iib galka ah waxaa cashuurta gadista ee ku waajibtay ku bixinayaan goobta ugu dhow ee maamulka dakhliga.
 5. Qaansheegtooyinku waa inay u lambareysan yihiin si taxane ah oo ka bilaabanaya lambarkii ay diiwaangashadeen maamulka dakhliga, marka ugu danbaysa ee xeraynta cashuurta gadista.

Qodobka 90-aad

Qiimaha La Cashuurayo.

Cashuurta gadista waxaa la bixinayaa qiimaha lagu caddeeyey Shaxda 6.1 ee cashuurta gadista.

Qodobka 91-aad

Caddaynta Cashuurta Gadista

1. Ganacsadaha bixinaya cashuurta iibka raacda ee uu uruuriyey waqtiga xadidan, waxaa waajib ku ah in uu caddeeyo isagoo isticmaalaya Qaabaysanaha (Form) caddaynta ee maamulka dakhliga kaasoo uu soo raacinayo.
 - b. Dhammaan dokumentiyada la xiriirka iibkiisa waqtigaa.
 - t. Qaabaysanayaasha muujinaya faah-faahinta laga rabo ganacsadaha sida magaca cashuur bixiyuhu ku diiwaangashan yahay, cinwaanka, goobta uu ku yaalo tirada taxanaha (serial number) badeecadaha la iibiyey iyo adeegyada la bixiyey qaab kasta oo lagu gaday (Credit or Cash).
 - j. Qiimaha badeecadda ama adeegga la bixiyey ee cashuurta ku waajibtay.
2. Warshadle kasta, waxaa waajib ku ah inuu sameeyo buug ama nidaam diiwaan galin lagu qoro:-
 - b. Wax soo saarka Warshadda.
 - t. Bakhaar soo gelidda iyo bixidda badeecadda.
3. Diiwaanka farqadda 2-aad waa in loo diyaariyaa, iyaddoo la raacayo habraaca maamulka dakhliga.



4. Ganacsade kasta oo cashuurtani ku waajibtay, buugtiisa ama nidaamkiisa (system) iibka diwaan-galinta qaansheegadka, waxaa qasab ku ah inuu usoo bandhigo maamulka dakhliga markasta oo ay codsadaan.

Qodobka 92-aad

Soo Xareynta Cashuur Gadista

Cashuur bixiyaha waxaa waajib ku ah inuu soo xareeyo cashuurta gadista, bisha cashuurta uu uruuriyey bisha xigta tobankeeda (10) keeda kama dambays.

CUTUBKA 9-aad

CASHUURTA WADDA MARISTA (ROAD TAX)

Qodobka 93-aad

Cashuurta Wadda Marista

Cashuurta wadda maristu waxay waajib ku tahay gaadiid kasta oo jooga gudaha Puntland.

Qodobka 94-aad

Diiwaan-galinta Gaadiidka ay Ku Waajibtay

Cashuurta Wadda Maristu

1. Maamulka cashuurahu waxay diiwaan-galinayaan gaadiid kasta marka la helo buleetada furdaddu kusoo cashuurtay iyo buugga lahaanshaha.
2. Gaadiid kasta oo soo gala sohdinta Puntland waa in laga diiwaan-galiyaa maamulka dakhliga, si waafaqsan farqadda 1-aad ee qodobkan.

Qodobka 95-aad

Gaadiidka leh Cashuur Dhaafka Joogtada ah

1. Gaadiidka laga dhaafayo cashuurta wadda marista:
 - b. Gaadiidka Dawladda.
 - t. Gaadiidka Safaaradaha/ama wakiillo dublimaasiyadeed, marka la hubiyo inay leeyihiin.
 - j. Gaadiidka ay mulkiyadeeda leeyihiin Qaramada Midoobey iyo hay'adaha Caalamiga ah.
 - x. Gaadiidka isbitaallada iyo gurmada/Badbaadada caafimaadka sida, ambalaasyada, gaadiidka maydka qaada, dab-damiska.
 - kh. Gaadiidka xeerku si kale u siiyey cashuur dhaafidda.



2. Gaadiidka leh cashuur dhaafka joogta ah ee lagu sheegay farqadda 1-aad ee qodobkan, haddii mulkiyaddu u wareegto cid ka baxsan kuwa leh cashuur dhaafka, gaadiidkaas waxaa ku waajibaya cashuurta furdadda ee marka hore laga dhaafay iyo cashuurta wada marista oo markaa uga bilaabanaysa.
3. Gaadiidka leh cashuur dhaafka joogta ah waa in ay sannad walba bilowgiisa yimaadaan xafiiska maamulka dakhliga, kana qaataan warqadda oggolaanshaha sannadlaha ah si loogu fududeeyo hawlahooda.

Qodobka 96-aad

Oggolaansho Fasax Ku Meel gaar Ah

1. Gaadiidka soo gala soohdimaha dawladda Puntland kana diiwaan-gashan maamul ka baxsan Puntland, joogayana wakhti cayiman oo uu leeyahay qof ama hay'ad, waxaa la siinayaa fasax wadda maris oo ku meel gaar ah oo aan ka badnayn muddo saddex bilood ah, waxaana siinaya fasaxa maamulka Dakhliga.
2. Gaadiidkaas waxa ku waajibaysa in ay bixiyaan cashuurta diiwaan-galinta si waafaqsan qodobka 77-aad ee xeerkan iyo cashuurta wadda marista ugu yaraan saddex (3) bilood ah.
3. Waqtiga uu joogo gudaha Puntland, waa in uu haystaa waraaqdda oggolaanshaha wadda marista.
4. Marka mudadaas ay dhammaato waa in uu gaadiidku bixiyaa dhammaan cashuuraha ku waajibay ama waa in uu ka baxaa Puntland.

Qodobka 97-aad

Wadashada Warqadda Caddeynta Bixinta Cashuurta.

1. Gaadiidka waxaa khasab ku ah inay mar walba wataan warqadda caddeynta Cashuur bixinta oo ay ku caddahay qadarka lacageed ee laga qaaday muwaadinka cashuur bixiyaha iyo muddada loo cashuuray.
2. Tasmadda (Sticker) caddeynta, waa inay ku dhegsan tahay meel muuqata oo gaariga banaankiisa ah sida muraayadda weyn ee gaariga oo aan ahayn nalalka korkooda ama rimoorka.
3. Waxaa mamnuuc ah inay socdaan baabuur aan sidan warqadda iyo tasmadda caddeynta cashuur bixinta, marka laga reebo gaadiidka ku xusan qodobka 95-aad ee xeerkan.
4. Haddii ay ka lunto ama xumaato warqadda caddeynta bixinta cashuurta, mulkiiluhu wuxuu codsi sababaysan u gudbinayaa xafiiska maamulka dakhliga, si nuqul kale loogu



sameeyo, waxaana uu bixinayaa cashuurta moorka si waafaqsan qodobka 104-aad ee xeerkan.

Qodobka 98-aad

Qaabka Qaadista Cashuurta Gaadiidka

Cashuurta waxaa loo qaadayaa saddex biloodle, lix biloodle ama sannadle, waxaana qaadaya xafiisyada u qaabilsan, waxayna bixinta cashuurta bilaamaysaa bilawga bisha janaayo ama bilawga 3 ama 6 billood walba bisha u horeysa. 15 casho kadib bilowga bixinta cashuurta waxaa raacayaa ganaaxyadda ku xusan qodobka 111-aad ee xeerkan.

Qodobka 99-aad

Qiimaha La Cashuurayo Cashuurta Wadda Marista

- 1- Cashuurta wadda marista waxaa lagu cashuurayaa qiimayaasha lagu caddeeyey shaxda 9.1 ee cashuurta wadda marista.
- 2- Cashuurta wadda marista waxaa lagu qiimaynayaa quwadda gaadiidka (HP) ama culayskooda (TONS).
- 3- Gaadiidka qaybtood oo cashuurtooda laga dhigo mid xilli ama xaalad ku xadidan, waxay maamulka dakhliga kasoo saarayaan habraac u gaara ah.
- 4- Gaadiidka waxaa si sannadle ah ugu waajibaysa cashuurta hubinta bed-qabka gaadiidka (Kalaweeto), habraacyada lagu maamulayo bed-qabka gaadiidka waxaa soo saaraya hay'adaha ay khusayso. qiimaha lagu cashuurayo waxaa lagu caddeeyey Shaxda 9.2 ee cashuurta hubinta badqabka gaadiidka.

Qodobka 100-aad

Ku Guul Daraysiga Bixinta Cashuurta Wadda Marista

Baabuurta ku guuldaraysta in ay cashuurta ku bixiyaan waqtiyada loo cayimay waxaa laga qaadi doona tallaabooyinka soo socda; -

1. In ciidamadda ilaaladda cashuuraha iyo ciidamadda ilaaladda waddooyinka ay baabuurka ka joojiyaan isticmaalka waddooyinka ayna xareeyaan ilaa inta uu ka bixinayo cashuurta, waxaana laga qaadayaa ganaaxyadda ku xusan qodobka 111-aad ee xeerkan.
2. Baabuurta lagu xareeyey goobaha ciidanka ilaaladda cashuuraha habeen kasta oo ay ku dhaxaan waxaa laga qaadayaa ganaaxyadda ku xusan qodobka 111-aad ee xeerkan.



Qodobka 101-aad

Baabuurta Fadhida ee Aan Shaqeynayn

Waa inuu gaari walba oo laga safrayo ama hawl kale u fariista sida cillad ku timaada gaariga la keeno ogaysiintiisa xafiiska maamulka dakhliga. Taasoo lagu caddayno kilometers (KM) gaariga meesha uu marayo iyo sababta uu u fariistay, waxaan laga soo saarayaa habraac u gaara oo arrinkan khuseeya.

CUTUBKA 10-aad

CASHUURTA MOORKA (Stamp Tax)

Qodobka 102-aad

Cashuurta Moorka

1. Cashuurta moorku waxay noqon kartaa mid cayiman (fixed) ama saamigal ah (proportional)
2. Cashuurta moorka cayiman waxay yeelanaysaa qiime go'an lagana qaadayo qoraal kasta oo ay ku waajibtay kuna qeexan xeerkan.
3. Cashuurta moorka ee saamiga galka ah (proportional tax) waxaa laga qaadayaa dadka waajibaadka lacag bixineed lagu leeyahay, badeecadaha la gadanayo, la iibsanayo, damaanad qaadka hantiyeed iyo rahanka, haddii bangiyada lagu kaydsado ama meel gaar ah la dhiganayo.
4. Dhacdo kasta oo qiime lacageed leh oo dawladdu qayb ka tahay waxaa laga qaadayaa cashuurta Moorka ee Boqolayda ah.

Qodobka 103-aad

Bixinta Cashuurta Moorka (Stamp Tax)

Cashuurta Moorka waxaa loo bixinayaa habka soo socda: -

1. Iyadoo la isticmaalayo warqadaha tigidyada moorku ku daabacan yahay.
2. Iyadoo la gadanayo tigidyada moorka laguna dhajinayo qoraallada la isticmaalayo.
3. Iyadoo lacag ahaan loogu bixinayo cashuurta moorka xafiisyada cashuuraha ama xafiis kasta oo Maamulka dakhliga u idmado.



Qodobka 104-aad

Qiimayaasha Cashuurta Moorka Cayiman

1. Go'aanada Madaniga ah (Civil Acts)

Cashuurta moorka cayiman waxaa laga qaadayaa qoraallada hoos ku qeexan sida ku cad Shaxda 10.1 ee cashuurta moorka go'aannada madaniga ah

b. Asalka iyo nuqullada go'aannada Maxkamadaha, qoraallada Nootaayadu ka marag noqotay ama caddaysay ayna diiwan-gelisay ama xafiisyo kale oo awood loo siiyey, lana caddeeyey asalnimada qoraalladaas, nashqado iyo wixii tafaasiil ah ee ku lifaaqan.

t. Asalka iyo nuqullada qoraallada u gaar ah shakhsi (Unilateral), lammaane (bilateral) iyo kuwo kooxeed-ba (multi literal) oo la xiriira curin, wax-ka bedelid, wax ku darid, dhammaystirid ama qiraal oo af ama dhaar ah nooc kasta oo uu yahay.

j. Asalka iyo nuqullada qoraallo la turjumay ama warbixinno la soo koobay, diiwaan-gelin iyo buugaag dib loo daabacay uu xaqiijiyey xafiis Dawladeed inay nuqulo sax ah yihiin iyo waraaqaha ka marag kacaya ee Dawladda.

x. Asalka iyo Nuqulada ballan qaadyo lagu heshiiyey oo qiime hantiyeed leh ama aan lahayn, caddaymaha awood siinta Qareennada ama wakiilashada dad gaara, warqadaha iibka ama gadashada, caddaymaha qaadashada ama bixinta deynta ama heshiiska maalgashiga iyo cadayn kasta oo saamaysa hanti, qaan, dil iyo mag.

kh. Asalka iyo nuqullada arjiyada dacwad furasho nooc kasta oo ay yihiin, qoraallada iyo nuqulada bangiyada sida deyn ama horumarin lacageed, kuwaas oo ka duwan asalka iyo nuqullada cashuurtoodu ku xusan tahay qodobada kale ee xeerkan.

2. Go'aano Maamul (Administrative Acts)

Dib u furista ,baarista ,arjiyada ,qoraallada dacwado maamul la xiriira, iyadoo aan markii hore la soo marin Maxkamad lana horgeeyey qaybaha maamulada Dawladda dhexe ama hoose waxaa ku waajibaya cashuurta moorka sida ku cad Shaxda 10.2 ee cashuuraha moorka ee go'aannada maamulka.

3. Go'aanada Garsoorka (Judicial Acts)



Cashuurta Moorka cayiman waxaa laga qaadayaa qoraallada hoos ku qeexan sida ku cad Shaxda 10.3 cashuuraha moorka ee go'aannada Garsoorka

- b. Go'aannada Maxkamadaha madaniga, qoraallada dhex-dhexaadinta iyo baarista qoraallada lagu keydiyey Maxkamadaha.
 - t. Asalka iyo qoraallada ay soo saaraan ama la horgaynayo maxkamadaha, ha noqdeen dacwad maamul ama mid madani ah, sida nuqullada iyo qoraallada loo diro dhinacyada is haya ama la haysto.
 - j. Go'aannada kala qaybinta ganaax wadareed, laguna mutaystay maamul xumo iyo sixitaanka maamul xumada kuna timid xad-gudub sharci ama khilaaf heshiis.
4. Go'aannada iyo Qoraallada Ajnabiga ah
- b. Qoraallada iyo go'aannada ganacsi ama ujeeddo sharci leh kana soo unkumay dalka dibadiisa kuna xusan qodobada xeerkan sida ku cad Shaxda 10.4 cashuurta moorka go'aannada iyo qoraallada ajnabiga ah.
 - t. Warqadiiba muddo dhan 7 maalmood gudahood marka ay soo galaan gudaha Puntland.
5. Manifestooyinka Maraakiibta, doonyaha iyo dayuuradaha (Ships, boats and Air Manifest) Cashuurta Moorka cayiman waxaa laga qaadayaa Caddeymaha hoos ku qeexan sida ku cad Shaxda 10.5 Cashuurta moorka ee Manifestooyinka doonyaha iyo dayuuradaha.

Qodobka 105-aad

Cashuurta Moorka Ee Boqolleyda ah (Proportional Tax)

1. Qaansheegatooyinka iyo dakhli kasta oo dawladda loo qabanayo & kharash kasta oo la bixinayo.
2. Dakhliga dawladda (Cashuuro Berri ama furdo) iyo Cashuurta dakhliga Shaqaalaha.
3. Cashuurta Moorka Boqollayda waxaa loo qaadayaa sida ku cad Shaxda 10.6 ee cashuurta moorka boqollayda ah.

Qodobka 106-aad

Qoraallada Laga Dhaafayo Cashuurta Moorka

Waxaa laga dhaafay cashuurta moorka qoraallada & heshiisyada soo socda:-

1. Deeqaaha ay bixiyaan hay'adaha samafalka ah.
2. Qoraallada hay'adaha Qaramada Midoobey.
3. Qoraallada safaaradaha iyo diplomaasiyiinta.



4. Qoraallada ka soo baxa xafiisyada Dawladda.

Qodobka 107-aad

Been Abuurka Iyo Laba Jeer Adeegsiga Moorka

Ciddii ay ku cadaato in ay dhalan rogtay ama labo jeer adeegsatay tigidyada iyo waraaqaha cashuurta moorka leh, wuxuu galayaa faldembiyeed, si waafaqsan xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed waxaana lagu ganaaxi karaa ganaaxyada ku xusan qodobka 111-aad ee xeerkan.

Qodobka 108-aad

Gaddida Iyo Isticmaalka Tigidyada

Iyo Warqadaha Moorka

1. Cid kasta oo gadda, jumlo ama tafaariq ahaan, tigidyada iyo warqadaha cashuurta Moorka oo been abuur ah waxay gelayaan fal danbiyeed waxaana lagu ciqaabayaa ganaaxyadda ku xusan qodobka 111-aad ee xeerkan.
2. Waxa keliya oo dalka dibadiisa iyo gudahiisa ku daabici kara kuna gadi kara warqadaha iyo tigidyada cashuurta moorka Wasaaradda iyo ciddii ay oggolaansho sharci ah u siiso.
3. Codsi, arji ama qoraal kasta oo uu ku dhejisan yahay tigidka cashuurta moorku waxaa xil ka saaran yahay mas'uul kasta inuu xaqiijiyo in isku tilaab lagu dhuftay taasoo caddaynaysa in la isticmaalay.

Qodobka 109-aad

Xil Gudashada Cashuurta Moorka

1. Dhammaan qoraallada ay ku waajibtay cashuurta moorka ee soo gelaya xafiisyada dawladda waa in ay hubiyaan in laga qaaday cashuurta moorka ee ku waajibtay, haddii kale dib loo celiyo.
2. Qoraal kasta oo ay ku waajibtay cashuurta moorka ee ku xusan xeerkan, waa in lagu dhejiyaa cashuurta moorka.
3. Heshiisyada iyo Qoraallada kale ee aan ka soo bixin dalka gudahiisa waxaa laga qaadayaa cashuurta Moorka xilliga ay soo gaaraan xafisyada cashuurta moorka qaabilsan.

Qodobka 110-aad

Qiima Dhaca Tigidyada (faraka bollo) Moorka

1. Sababaha ay ku qiime dhacayaan tigidyada cashuurta moorka waa sidan hoos ku xusan:-
 - a. Haddii la soo been abuurtay.



- t. Haddii horay loo isticmaaley.
- j. Haddii la tirtiro ama la dhalan rogo.

CUTUBKA 11-aad
DAKHLIYADDA KALE
Qodobka 111-aad
Ganaaxyada

1. Ganaaxyada soo socda ayaa xeerkani ku waajibinaya dhammaan ciddii aan u hoggaasamin shuruucda cashuuraha iyo habraacyadda dakhliga.
 - b. Ka been sheegid caddaymaha cashuurta iyo dhammaan qoraallada loo soo gudbiyo maamulka dakhliga.
 - t. La daahidda cusboonaysiinta shatiyada dawladda.
 - j. La daahidda bixinta cashuurta xilligeeda la gaaray.
 - x. Is hor taagid go'aan cashuureed.
 - kh. Been abuurka qoraallada iyo shahaadooyinka cashuuraha.
 - d. La dhuumashadda cashuur waajibtay.
 - r. Ku guul daraysiga soo cadaynta cashuurta xilligeeda la joogo
 - s. Dhinaanshaha Bixinta cashuurta waajibtay.
 - sh. Fulin hawlaha maamulka dakhliga wakiilasho la'aan.
2. Qiimayaasha ganaaxyada lagu sheegay farqadda 1-aad ee qodobkan waxaa lagu caddeeyey shaxda 11.1 ee Ganaaxyada Cashuuraha.
3. Maamulka Ganaaxyadda iyaga oo faah-faahsan waxaa lagu qeexay xeerka Maamulka dakhliga.

Qodobka 112-aad
Ajuurooyinka Iyo Shatiyada.

- 1- Ajuurooyinka iyo Shatiyada waxaa loo raacayaa xeerarka Golaha Wakiilladu ansixiyey.
- 2- Xeerkan waxaa lagu qeexayaa oo kaliya qiimayaasha la qaadayo ee la xiriira adeegyadooda.
- 3- Ajuurooyinka xeerkan uusan qeexayn waxay noqonyaan kuwa aan jirin una baahan in lagu soo daro shaxaha cashuuraha ee sannad miisaaniyadeedka.



- 4- Ajuurooyinka iyo shatiyada qiimayaashooda waxaa lagu caddeeyey shaxaha ka bilaabanaya 11.2 , shax walba waxaa ku astaysan magaca ama nooca ajuuradda/shati iyo Wasaaradda ama hay'ada maamula.

CUTUBKA 12-aad

QODOBADA QUBANAHA AH EE XEERKA

Qodobka 113-aad

Shaxaha Cashuuraha

- 1- Shaxaha cashuuraha waa shaxaha lagu taxay lifaaqa labaad ee xeerkan.
- 2- Waxaa wax-ka-beddel lagu samayn karaa shaxaha cashuuraha, iyadoo saamaynayn xeerkan, waxayna dhaqangal noqonayaan marka Golaha Wakiilladu Ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro Faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.
- 3- Sannad kasta waa in la raaciyaa shaxaha cashuuraha Miisaniyadda xataa haddii aanay jirin wax iska beddeley.
- 4- Maamulka dakhliga waxay isticmaalayaan shaxaha lagu ansixiyey Miisaaniyadda dawladda ee sannad walba, halka shaxihii ka horeeyey la tirtirayo.
- 5- Shaxaha waxay isticmaal gal noqonayaan bilowga sannadka cusub.

Qodobka 114-aad

Xeer-nidaamiye

Wasiirka Wasaaraddu wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro xeer-nidaamiye, wareegtooyin, hageyaal iyo tilmaamo wax lagu saxayo, laguna toosinayo oo aan ka hor-imaanayn qodoboda xeerkan.

Qodobka 115-aad

Burin/Laalid

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor imaanayn ama aan la socon karin xeerkan.

Qodobka 116-aad

Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiilladu Ansixiyo, Madaxwaynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro Faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



Lifaaqa Kawaad: Cashuur Ka reebid (la xariira Qodobka 65-aad)


SN	Noocyadda Cashuur Ka Reebidda	Cida ka reebaysa Cashuurta
1	Cashuurta Dakhliga shaqada	Loo shaqeeyaha
2	Cashuurta Dakhliga kirada	Kiraystaha
3	Cashuurta Dakhliga qandaraasyada	Qandaraas bixiyaha
4	Cashuurta Macaashka saamiyada	Maamulka shirkada
5	Cashuurta Dakhliga ma degganaha	Wakiilkiisa
6	Cashuurta Dakhliga iibka saamiyada	Shirkada uu ka dhacay iibka saamiga
7	Cashuurta Macaashka lahaanshaha	Maamulka shirkada
8	Cashuurta Dakhliga faa'iidada ganacsiga	Furdooyinka
9	Cashuurta Dheefta Hantida	Nootaayada
10	Qof cashuur hore looga reebay ku bixinaya	Goobaha reebi kara cashuuraha
11	Kala wareejinta Hantida iyo dheefta Hantida	Nootaayadda
12	Cashuurta Diiwaangalinta	Hay'adaha Dawladda



Lifaaqa Labaad: Shaxaha Cashuuraha (La xariira qodobka 113-aad)

Madaxa	Shaxda	Magaca Shaxda
[3] (22)(2)	3.1	Cashuurta Faa'idada macaashka ganacsiga iyo xirfadlayaasha
[3] (22)(3)	3.2	Cashuurta qiyaasta dakhliga
[3] (22)(5)	3.3	Cashuurta macaashka gaadiidka xamuulka.
[3] (22)(6)	3.4	Cashuurta macaashka wax soo saarka beeraha
[3] (22)(7)	3.5	Cashuurta macaashka saamiga
[3] (22)(8)	3.6	Cashuurta dakhliga mar qaadka ah
[3] (22)(9)	3.7	Cashuurta dakhliga kirooyinka
[3] (22)(10)	3.8	Cashuurta dakhliga Shaqada.
[3] (26)(2)	3.9	Gunooyinka aan lacagta ahayn
[3] (27)(2)	3.10	Dakhliga taakulooyinka
[3] (28)(1)	3.11	Cashuurta dakhliga xoogsatada
[3] (29)(1)	3.12	Cashuurta gunnadda gudiyada sare
[3] (42)(2)	3.13	Qiima dhaca hantida
[4] (53)(1)	4.1	Cashuurta dakhliga shirkadaha
[5] (64)(3)	5.1	Cashuurta dheefta Hantida
[6] (67)(1)	6.1	Cashuur ka reebidda ma deggenayaasha
[6] (67)(3)	6.2	Cashuur ka reebidda macaashka la haanshaha ma deggane
[6] (69)(3)	6.3	Cashuur ka reebidda soo dajiyaal
[6] (70)(1)	6.4	Cashuur ka reebidda qandaraasyada
[7] (79)(1)	7.1	Cashuurta Diiwaangalinta
[7] (84)(1)	7.2	Cashuurta diiwaangalinta kala wareejinta hantida
[7] (84)(2)	7.3	Cashuurta diiwaangalinta kala wareejinta Gaadiidka
[7] (84)(3)	7.4	Cashuurta diiwaangalinta kala wareejinta hantida ma gurta ah ee hibadda, dhaxalka ama dhulka qofka ugu horeeyey lahaanshihiisa.
[8] (91)(1)	8.1	Cashuurta Gadista.
[9] (100)(1)	9.1	Cashuurta Waddo marista.
[9] (100)(4)	9.2	Cashuurta badqabka gaadiidka (Kalaweeto)
[10] (104)(1)	10.1	Cashuurta moorka ee go'aannada madaniga ah
[10] (104)(2)	10.2	Cashuurta moorka ee go'aannada Maamulka.
[10] (105)(3)	10.3	Cashuurta moorka ee go'aanadda Garsoorka.
[10] (104)(4)	10.4	Cashuurta moorka ee go'aannada iyo qoraallada ajaanibta ah.
[10] (105)(5)	10.5	Cashuurta moorka ee manifestooyinka doonyaha iyo dayuuradaha
[10] (105)(3)	10.6	Cashuurta moorka ee boqolleyda ah
[11] (112)(2)	11.1	Ganaaxyadda cashuuraha.
[11] (103)(4)	11.2	Ajuurooyinka iyo shatiyadda.





DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

SHAXAHA CASHUURAHA
SANADKA 2023

Garoowe, Desember, 2023



TUSMADDA

BOGGA

WASAARADDA MAALIYADDA	4
Shaxda 3.1 Cashuurta Faa'iidada Macaashka Ganacsiga iyo Xirfadlayaasha.....	4
Shaxda 3.2 Cashuurta Qiyaasta Dakhliga.....	4
Shaxda 3.3 Cashuurta Dakhliga Gaadiidka Xamuulka	4
Shaxda 3.4 Cashuurta Dakhliga ee wax-soo-saarka Beeraha.....	4
Shaxda 3.5 Cashuurta Macaashka Saamiyada.....	4
Shaxda 3.6 Cashuurta Dakhliga Kirooyinka	4
Shaxda 3.7 Cashuurta Dakhliga Shaqada	4
Shaxda 3.8 Gunnooyinka aan lacagta ahayn.....	4
Shaxda 3.9 Dakhliyadda Taakulooyinka.....	4
Shaxda 3.10 Cashuurta Dakhliga Xoogsatada	5
Shaxda 3.11 Cashuurta Gunnada Guddiyada sare.....	5
Shaxda 3.13 Cashuurta Fasaxa Isticmaalka Lahaanshaha ee khayraadka dabiiciga ah.....	5
Shaxda 4.1 Cashuurta Dakhliga Shirkadaha	5
Shaxda 5.1 Cashuurta Dheefta Hantida.....	5
Shaxda 6.1 Cashuur ka Haynta ma deggenayaasha.....	5
Shaxda 6.2 Cashuur ka Haynta Fasaxa Isticmaalka Lahaanshaha ee ganacsiyadda ma deggenayaasha	5
Shaxda 7.1 Cashuurta Diiwaangelinta.....	5
Shaxda 7.2 Cashuurta Diiwaan-gelinta kala wareejinta hantida	6
Shaxda 7.3 Cashuurta Diiwaan-gelinta kala wareejinta Gaadiidka	6
Shaxda 7.4 Cashuurta Diiwaangelinta hantidda ma guurta ah ee hibadda,dhaxalka ama dhulka qofka ugu horeyey lahaanshihiisa	6
Shaxda 8.1 Cashuurta Gadista.....	6
Shaxda 9.1 Cashuurta Waddo Marista.....	6
Shaxda 9.2 Cashuurta Bed-qabka Gaadiidka (Kala-weto).....	7
Shaxda 10.1 Cashuurta Moorka ee Go'aannada Madaniga ah.....	7
Shaxda 10.2 Cashuurta Moorka ee Go'aannada Maamulka.....	7
Shaxda 10.3 Cashuurta Moorka ee Go'aannada Garsoorka.....	7
Shaxda 10.4 Cashuurta moorka ee Go'aanadda iyo qoraallada Ajnabiga ah.....	7
Shaxda 10.5 Cashuurta Moorka ee Manifestooyinka Doonyaha iyo Dayuuradaha.....	7



Shaxda 10.6 Cashuurta Moorka ee Boqolleyda ah.....	8
Shaxda 11.1 Ganaaxyadda Cashuuraha.	8
GARSOORKA.....	8
Shaxda 11.2 Ajuurooyinka Maxkamadda.....	8
WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GAADIIDKA.....	9
Shaxda 11.3 Ajuurooyinka Wasaaradda Hawlaha Guud.....	9
Shaxda 11.4 Ajuuradda Oggolaanshaha Shaqada.....	9
LAANTA SOCDAALKA IYO JINSIYADAHA SOOMAALIYA.....	10
Shaxda 11.5 Ajuurooyinka Laanta Socdaalka.....	10
WASAARADDA CADAALADDA, DIINTA IYO DHAQANCALINTA.....	10
Shaxda 11.6 Ajuurooyinka Wasaaradda Cadaaladda.....	10
WASAARADDA KALLUUMAYSIGA IYO KHAYRAADKA BADDA.....	10
Shaxda 11.7 Shatiga Doonyaha Iyo Maraakiibta Kalluumaysiga.....	10
WAKAALADDAHA BIYAHA.....	10
Shaxda 11.8 Shatiga Riigaga Iyo Shirkadaha Dhismaha Biyaha.....	10
WASAARADDA QORSHAYNTA, DHAQAALAHADA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA.....	11
Shaxda 11.9 Shatiyadda Hay'adaha.....	11
WASAARADDA DUULISTA HAWADA IYO GAROOMADA.....	11
Shaxda 11.10 Ajuurooyinka Diyaaradaha.....	11
WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADDAHA.....	11
Shaxda 11.11 Ajuurooyinka Shatiyadda Ganacsiga.....	11
WASAARADDA WARFAAFINTA, HIDAHA, DHAQANKA IYO DALXIISKA.....	12
Shaxda 11.12 Ajuurooyinka Wasaaradda Isgaarsiinta.....	12
WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA.....	13
Shaxda 11.13 Ajuurooyinka Wasaaradda Beeraha.....	13
WASAARADDA DEEGAANKA IYO ISBADELKA CIMILADDA.....	13
Shaxda 11.14 Ajuurooyinka Wasaaradda Deegaanka.....	13
HAY'ADDA QANDARAAS BIXINTA.....	13
WASAARADA TAMATA, MACDANTA IYO BIYAHA.....	14



SHAXAHA CASHUURAHA

[Si waafaqsan Qodobka 113-aad ee Sharciga Cashuuraha Berriga (2023)]

[MADAXA] (Qodobka) (Farqadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA	QIIMAHA
WASAARADDA MAALIYADDA		
[3] (22)(2)	Shaxda 3.1 Cashuurta Faa'iidada Macaashka Ganacsiga iyo Xirfadlayaasha	
	Macaashka Ganaciyada iyo Xirfadlayaasha	6%
[3] (22)(3)	Shaxda 3.2 Cashuurta Qiyaasta Dakhliga	
	Cashuurta Macaashka ee Qiimaynta Ganacsiyada yar-yar	2%
	Cashuurta Macaashka ee Qiimaynta Ganacsiyada dhexe	6%
	Cashuurta Macaashka ee Qiimaynta Ganacsiyada Xirfadlayaasha	6%
[3] (22)(5)	Shaxda 3.3 Cashuurta Dakhliga Gaadiidka Xamuulka	
	Samtareele (Badeeco)	13-37 ton \$50
	Candhamaydle (Badeeco)	8-12 ton \$30
	Sideed Boole (Badeeco)	6-8 ton \$25
	Waraad (Badeeco)	3-4 ton \$20
	Dhayne (Badeeco)	1-2 ton \$6
	Waarad Booyad (Shidaal)	4 ton \$40
	8 Boole Booyad (Shidaal)	6-8 ton \$50
	Candhamaydle Booyad (Shidaal)	9-12 ton \$60
	Santareele Booyad (Shidaal)	13-37 ton \$70
[3] (22)(6)	Shaxda 3.4 Cashuurta Dakhliga ee wax-soo-saarka Beeraha	
	Macaashka wax-soo-saarka Beeraha	2%
[3] (22)(7)	Shaxda 3.5 Cashuurta Macaashka Saamiyada	
	Macaashka Saamiyadda	5%
[3] (22)(9)	Shaxda 3.6 Cashuurta Dakhliga Kirooyinka	
	Dakhliga Kirooyinka (80%)	4%
[3] (22)(10)	Shaxda 3.7 Cashuurta Dakhliga Shaqada	
	0-\$100	0%
	\$101-\$800	6%
	\$801-ka badan.	12%
[3] (26)(2)	Shaxda 3.8 Gunnooyinka aan lacagta ahayn	
	Gaadiidka qofka Shaqaalaha la siiyo	30%
	Dhismayaasha qofka Shaqaalaha la siiyo	20%
[3] (27)(2)	Shaxda 3.9 Dakhliyadda Taakulooyinka	
	Taakulo Caafimaad	5%
	Taakuladda Horumarinta Shaqada	1%



[MADAXA] (Qodobka) (Farqadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA	QIIMAHA
[3] (28)(1)	Shaxda 3.10 Cashuurta Dakhliga Xoogsatada	
	Dakhliga Shaqada ee Shaqaalaha Xoogsatada ah	2%
[3] (29)(1)	Shaxda 3.11 Cashuurta Gunnada Guddiyada sare	
	Dakhliga Gunno Sharafeedka Guddiyada sare	12%
[3] (42)(2)	Shaxda 3.12 Qiime dhaca Hantida	
	Dhismayaasha, qalabka warshadaha culus iyo mishiinnada ayaa sanad walba qiimo dhimis lagu sameeyaa	10%
	Hantida aan la taaban Karin (intangible Asset) oo ay ka mid yihiin sumcadda wanaagsan (Goodwill) ee laga soo iibsado gacan saddexaad (Third Party) ayaa qiima dhaca sanad walba	20%
	Qalabka isgaarsiinta ee noloshoodu ka badan tahay toban (10) sano ayaa sanad walba la qiimeeyaa iyadoo lagu saleynayo heerka qiima	15%
	Kombiyuutarrada, qalabyada iyo hababka isgaarsiinta ee noloshoodu ka yar tahay toban (10) sano qiima dhacooda	30%
	Hanti kasta oo kale oo ganacsi ee noloshoodu ka yar tahay toban (10) sano qiima dhacooda	30%
	Sicir dhimista ama qiimaha asalka ah yahay kun (2,000) oo USD dollar ah iyo wixii ka yar,	100%
[3] (48)(3)	Shaxda 3.13 Cashuurta Fasaxa Isticmaalka Lahaanshaha ee khayraadka dabiiciga ah	
	Fasaxa isticmaalka lahaanshaha ee macdanta iyo waxyaabaha dhulka laga soo saaro	5%
[4] (53) (1)	Shaxda 4.1 Cashuurta Dakhliga Shirkadaha	
	Faa'iidada dakhliga Shirkaddaha	12%
[5] (64)(3)	Shaxda 5.1 Cashuurta Dheefta Hantida	
	Dakhliga dheefta hantida	5%
[6] (67)(1)	Shaxda 6.1 Cashuur ka Haynta ma deggenayaasha	
	Cashuur ka haynta dakhliyadda ma deggenayaasha	15%
[6] (67)(3)	Shaxda 6.2 Cashuur ka Haynta Fasaxa Isticmaalka Lahaanshaha ee ganacsiyadda ma degganayaasha	
	Cashuur ka haynta fasaxa lahaanshaha ee ganacsiyadda ma degganayaasha	5%
[6] (69)(3)	Shaxda 6.3 Cashuur ka Haynta soo dajiyayaasha	
	Cashuur ka Haynta soo dajiyayaasha (Importers)	5%
[6] (70)(1)	Shaxda 6.4 Cashuur ka Haynta Qandaraasyadda	
	Cashuur ka reebidda qiimaha qandaraasyadda	0.7%
[7] (79)(1)	Shaxda 7.1 Cashuurta Diiwaangelinta	
	Diiwaangelinta Qaansheegatooyinka	3%
	Diiwaangelinta heshiis Qandaraas	4.5%
	Diiwaangelinta Baabuurta Oggolaansho Fasax Ku Meel gaadh Ah	\$ 7
	Hanti Maguurto Ah Marka La Kala Qaybsanayo	3%
	Diiwaangelinta Heshiis Kiro Guri (Contractor Locozione)	1%



[MADAXA] (Qodobka) (Farqadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA			QIIMAHA	
		Diiwaangelinta Baasaboorka Cusub		\$20	
		Diiwaangelinta Waraaqaha caddaynta dembi la'aanta		\$20	
		Diiwaangelinta Dhoofayaasha Wata Passport Somali (Dadka Waaweyn)		\$20	
		Diiwaangelinta Gaadiidka cusub (Baabuurta)		\$48	
		Diiwaangelinta Gaadiidka Cusub (mooto iyo bajaaj)		\$31	
		Diiwaangelinta Gaadiidka cusub (Maraakiibta)		\$100	
		Diiwaangelinta Gaadiidka cusub (doonyaha)		\$50	
		Diiwaangelinta Gaadiidka cusub (diyaaradaha)		\$150	
		Diiwaangelinta Dhulka beeraha si Sanadle ah (1-5 Hecter)		\$100	
		Diiwaangelinta Dhulka beeraha si Sannadle ah (6-10 Hecter)		\$200	
		Diiwaangelinta Dhulka beeraha si Sanadle ah (10 Hecter ka badan)		\$500	
		Diiwaangelinta Magac bedelka lahaanshaha baabuurta		\$10	
[7] (84)(1)	Shaxda 7.2 Cashuurta Diiwaan-gelinta kala wareejinta hantida				
		\$100 – 9,999		2%	
		\$10,000 – 99,999		1.5%	
		\$100,000 – iyo wixii ka badan		0.5%	
[7] (84)(2)	Shaxda 7.3 Cashuurta Diiwaan-gelinta kala wareejinta Gaadiidka				
		HP (baabuurta yaryar)		\$15	
		TON (Baabuurta waaweyn)		\$20	
		GAADIIDKA BADDA		\$25	
		BAJAAJTA IYO MOOTOOYINKA		\$10	
[7] (84)(3)	Shaxda 7.4 Cashuurta Diiwaangelinta hantidda ma guurta ah ee hibadda, dhaxalka ama dhulka qofka ugu horeyey lahaanshihiisa				
		ZONE A1 M ²		\$0.5	
		ZONE B 1 M ²		\$0.3	
		ZONE C 1 M ²		\$0.15	
[8] (91)(1)	Shaxda 8.1 Cashuurta Gadista				
		Cashuurta gadista adeegga iyo badeecadaha		5%	
		Cashuurta gadista adeegga biyaha iyo korontadda		3%	
		Cashuurta gadista wax-soo-saarka khayraadka dabiiciga		2%	
[9] (100)(1)	Shaxda 9.1 Cashuurta Waddo Marista				
			Saddex biloodle	Lix biloodle	
			Sannadle		
		Baabuurta 14 HP	\$30	\$58	\$ 114
		Baabuurta 18 HP	\$37	\$72	\$142
		Baabuurta 21 HP	\$51	\$100	\$198
		Baabuurta 24 HP	\$65	\$128	\$254
		Baabuurta 1 Ton	\$20	\$38	\$74
		Baabuurta 2 Ton	\$23	\$44	\$86
		Baabuurta 3 Ton	\$28	\$54	\$106



[MADAXA] (Qodobka) (Fargadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA			QIIMAHA
	Baabuurta 4 Ton	\$43	\$84	\$166
	Baabuurta 5-6 Ton	\$56	\$110	\$218
	Baabuurta 7-12 Ton	\$91	\$180	\$358
	Baabuurta 13-24 Ton	\$96	\$192	\$382
	Baabuurta 25-36 Ton	\$123	\$244	\$486
	Baabuurta 37-70 Ton	\$133	\$264	\$526
	Baabuurta 70 ton iyo ka badan	\$143	\$284	\$566
	Bajaaj	\$16	\$30	\$58
	Motto	\$16	\$30	\$58
[9] (100)(4)	Shaxda 9.2 Cashuurta Bed-qabka Gaadiidka (Kala-weto)			
	Baabuurta			\$33
	Bajaaj/Motto			\$18
[10] (105)(1)	Shaxda 10.1 Cashuurta Moorka ee Go'aannada Madaniga ah			
	Qiimaha Moorka ee qoraallada Madaniga ah			\$1
[10] (105)(2)	Shaxda 10.2 Cashuurta Moorka ee Go'aannada Maamulka			
	Shahaadada dugsiyada sare, farsamada iyo diploma-ha			\$2
	Shahaadada iyo caddaymaha jaamacada heerka 1-aad (Bachelor)			\$5
	Shahaadooyinka iyo caddaymaha sare (high diploma)			\$3
	Shahaadada iyo caddaymaha jamacada heerka 2-aad (MA am MSC)			\$7
	Shahaadada iyo caddaymaha jamacadaha heerka 3-aad (PHD)			\$10
	Asalka warbixin xilliyeedka dugsiyada (school Terminal/yearly reports)			\$1
	Oggolaanshaha cashuur dhaafyadda			\$10
	Waraqda caddaynta cashuur bixinta			\$1
	Asalka Rukhsadaha Maamulka sida shatiyadda			\$2
	Shahaadooyinka ama qoraallada caddaynta guurka			\$2
	Shahaadooyinka ama qoraallada caddaynta furniinka			\$5
[10] (105) (3)	Shaxda 10.3 Cashuurta Moorka ee Go'aannada Garsoorka			
	Qiimaha Moorka ee qoraallada Garsoorka			\$2
[10] (105)(4)	Shaxda 10.4 Cashuurta moorka ee Go'aanadda iyo qoraallada Ajnabiga ah			
	Go'aannada iyo Qoraallada Ajnabiga ah			\$10
[10] (105)(5)	Shaxda 10.5 Cashuurta Moorka ee Manifestooyinka Doonyaha iyo Dayuuradaha			
	Caddayn shixnadeedka (Manifest) maraakiibta waaweyn			\$100
	Caddayn shixnadeedka (Manifest) gaadiidka kale oo ay ku jiraan doonyaha matoorka leh ee ganacsiga			\$50
	Caddayn shixnadeedka (Manifest) Doonyaha kalluumaysiga ajnabiga			\$30
	Caddayn shixnadeedka (Manifest) Doonyaha kalluumaysiga wadaniga ah			\$15



[MADAXA] (Qodobka) (Farqadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA	QIIMAHA
	Caddayn shixnadeedka (Manafest) diyaaradaha yaryar	\$30
	Caddayn shixnadeedka (Manafest) diyaaradaha waaweyn	\$50
[10] (106)(3)	Shaxda 10.6 Cashuurta Moorka ee Boqolleyda ah	
	Kharashaadka Dawladda waxaa la qaadayaa qiimaha guud	2%
	Dakhliga Dawladda qiimaha ugu dambeeya.	2%
	Cashuurta Mushaarka shaqaalaha	2%
[11] (112) (2)	Shaxda 11.1 Ganaaxyadda Cashuuraha.	
	Cashuur ka been sheegida	\$300
	Ka daahida qaadashadda Shatiyadda Dawladda	30%
	Bixin La'aanta Cashuurta	10%
	Is hortaagid go'aan cashuureed	\$1000
	Been abuurid qoraallada cashuuraha iyo shahaadooyinka	\$500
	Cashuur La dhuumasho (Cashuurta lala dhuuntay)	50%
	Ku guuldaraysiga in la soo caddeeyo cashuurta	\$100
	Qarinta ama yareynta cashuurta dhabta ah	10%
	Ilaalin la'aanta documentiyadda cashuuraha	\$200
	Baabuurta lagu soo qabto ololaha cashuuraha gaadiidka	3%
GARSOORKA		
[11] (113) (4)	Shaxda 11.2 Ajuurooyinka Maxkamadda	
	Maxkamada Sare	
	Gal-furis idaari ah	\$150
	Dib u eegis	\$300
	Gal-furis dacwad doorasho Madaxtooyo	\$1,000
	Gal-furis dacwad doorasho Golaha Wakiilada	\$500
	Gal-furis dacwad doorasho Golaha Deegaanka	200
	Gal-furis dacwad dastuuri ah	\$500
	Ruqsad Qareen marka kowaad	\$200
	Cusboonaysiin ruqsad qareen (sanadle)	\$100
	Ganaax	\$ qiimaha ganaaxa
	Xabsi gadasho	\$ 4 Maalintii
	Maxkamada Racfaanka	
	Sugitaan mulkiyad	\$50
	Ganaax	\$ qiimaha ganaaxa
	Xabsi gadasho	\$ 4 Maalintii
	Maxkamada Derejada Koowaad	
	Cashuurta dacwadda madaniga ah ee ku saabsan xuquuqda lacagta ama wax u dhigma lagu qiimayn karo) Halmar	5%
	Cashuurta dacwad madani ah oo ku saabsan xuquuq aan lacag lagu qiimayn Karin	\$50
	Is-hortaag fulin	\$150
	Dacwad shaqaale	\$25
	Fulin	1%



[MADAXA] (Qodobka) (Farqadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA		QIIMAHA
		Shahaadada furiinka	\$100
		Fasakh	\$100
		Shahaadada guurka	\$50
		Gal furis madani/Dhaxal	\$20
		Wakaalad	\$30
		Dhaxal koob	\$100
		Dhaxal qaybin	1%
		Shufca	1%
		Caddayn Waalid/Xanaaanaynta	\$10
		Caddeyn Baasaboorka caruurta	\$10
		Caddayn wax ka badalid basaboorka	\$20
		Caddayn document lumay	\$10
		Caddayn dhimasho	\$10
		Diiwaangelinta hantida maguurtada ah	\$20
		Diiwaangelinta Rahan	\$25
		Diiwaangelinta Shirkadaha	\$50
		Ansixin wakaalad	\$20
		Ganaax	\$ qiimaha ganaaxa
		Xabsi gadasho	\$ 4 Maalintii
WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GAADIIDKA			
[11] (112) (4)	Shaxda 11.3 Ajuurooyinka Wasaaradda Hawlaha Guud		
	Ajuuradda Taarkadda Baabuurta		
		Baabuurta	\$69
		Bajaaj/Motto	\$23
	Ajuuradda Shatiga Baabuurta		
		Grade A	\$42
		Grade B	\$52
		Grade C	\$62
	Ruqsadda Shirkadaha Dhismayaasha iyo Farsamayaqaannada		
	Shirkadaha Dhismayaasha	Diiwaangelin	Cusboonaysiin
	Grade A	\$500	\$200
	Grade B	\$300	\$100
	Grade C	\$100	\$50
	Ajaanibta	\$2000	\$1000
	Farsamayaqaannada	Diiwaangelin	Cusboonaysiin
	Grade A	\$150	\$100
	Grade B	\$100	\$50
	Grade C	\$80	\$50
	Ajaanibta	\$500	\$300
WASAARADDA SH, SH, DH IYO CIYAARAHA			
[11] (112) (4)	Shaxda 11.4 Ajuuradda Oggolaanshaha Shaqada		
		Shaqaalaha shirkaddaha isgaarsiinta	\$200
		Shaqaalaha Goobaha caafimaadka	\$150



[MADAXA] (Qodobka) (Farqadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA	QIIMAHA
	Shaqaalaha dhismaha/Qurxinta Dhismayaasha	\$100
	Shaqaalaha Waxsoosaarka Warshadaha	\$100
	Shaqaalaha jaamacadaha	\$100
	Shaqaalaha iskooladda	\$50
	Shaqaalaha hotelada iyo adeegyadda la xariira hotelada	\$100
	Shaqaale Maamul/madax sare ee ganacsi (Manager and high technical experts)	\$400
	Shaqaalaha/khuburadda hayadaha caalamiga,maxaliga iyo dawladda	\$400
LAANTA SOCDAALKA IYO JINSIYADAHA SOOMAALIYA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.5 Ajuurooyinka Laanta Socdaalka	
	Dal ku gal Ajaanibta	\$60
	Qurbo joogta Soomaalida ah	\$60
	Dal ku gal Ajaanibta Isticmaalka badan	\$100
	Degnanasho Dalka ah	\$150
WASAARADDA CADAALADDA, DIINTA IYO DHAQANCALINTA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.6 Ajuurooyinka Wasaaradda Cadaaladda	
	Ruqsad Cusub Nootaayada	\$300
	Cusboonaysiinta Nootaayadalaysimada	\$150
	Ruqsadda xujeyda iyo Cumradda	\$50
	Ruqsadda Shirkadaha Law Firmska	\$100
	Tasdiiqin Caafimaadka la xiriira	\$30
	Tasdiiqinada kale	\$ 50
	Ruqsadaha Macalimiinta	\$30
	Ruqsadaha Shifada(Cilaajyadda)	\$100
	Ruqsadaha Dhaqan celinta	\$100
	Ruqsadda Wadaadada Sima	\$50
WASAARADDA KALLUUMAYSIGA IYO KHAYRAADKA BADDA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.7 Shatiga Doonyaha Iyo Maraakiibta Kalluumaysiga	
	Jilaab Yaman (10 TON)	\$ 1500
	Jilaab somali (10 TON)	\$ 1000
	Istilaam Yaman (10 TON)	\$ 1000
	istilaam Soomaali (10 TON)	\$300
	Canqar (10 TON)	\$ 2500
	Xaawi (10 TON)	\$ 3,000
	Eeraani	\$ 5,500
WAKAALADDAHA BIYAHA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.8 Shatiga Riigaga Iyo Shirkadaha Dhismaha Biyaha	
	Ruqsadda Riiga Ceelasha	\$300
	Ruqsadda Shirkadaha Ceelasha goda	\$150



[MADAXA] (Qodobka) (Farqadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA	QIIMAHA
WASAARADDA QORSHAYNTA, DHAQAALAHA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.9 Shatiyadda Hay'adaha	
	Shatiga Cusub (New INGO'S)	\$1,020
	Shatiga Cusboonaysiin INGO'S	\$510
	Shatiga Cusub LNGO'S	\$204
	Shatiga Cusboonaysiin LNGO'S	\$102
WASAARADDA DUULISTA HAWADA IYO GAROOMADA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.10 Ajuurooyinka Diyaaradaha	
	Khidmadda Adeegga Hawada/ Navigation fee	\$100/\$200
	Khidmadda Xamuulka iyo Diyaaradaha/ Cargo royalty	\$30 per tons
	Khidmadda Diiwaangelinta Diyaaradaha/Registration fee.	\$400 Sanadkii
	Khidmadda Shidaalka Diyaarada/ Fuel Charge	\$2 per drum
	Tickets	5%
	Land fee	\$100
	Oggolaanshaha (permission fee)	\$1000 Sanadkii
WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADDAHA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.11 Ajuurooyinka Shatiyadda Ganacsiga	
	Shatiyadda Ganacsiga Guud	
	Heerka Ganacsiga ee Grade A	\$350
	Heerka Ganacsiga ee Grade B	\$250
	Heerka Ganacsiga ee Grade C	\$137
	Heerka Ganacsiga ee Grade D	\$86
	Shatiyadda Shirkadaha Adeeg Bixiyaha Ah	
	Adeeg Bixiye (Service provider) Grade A	\$661
	Adeeg Bixiye (Service provider) Grade B	\$345
	Adeeg Bixiye (Service provider) Grade C	\$249
	Adeeg Bixiye (Service provider) Grade D	\$90
	Shatiyadda Dhoofinta Iyo Soojedinta	
	Heerka Ganacsi ee (Import and Export) Grade A	\$512
	Heerka Ganacsi ee (Import and Export) Grade B	\$345
	Heerka Ganacsi ee (Import and Export) Grade C	\$150
	Shatiyadda Wakiilada Ganacsiga	
	Heerka (Grade A)	\$512
	Heerka (Grade B)	\$345
	Shatiyadda Shirkadaha Caalamiga Ah	
	Shirkada Caalamiga ah Grade A	\$1,500
	Shirkada Caalamiga ah Grade B	\$1,050
	Shatiyadda Warshadaha	
	Warshada(industry) Grade A	\$167
	Warshada(industry) Grade B	\$106
	Warshada(industry) Grade C	\$76



[MADAXA] (Qodobka) (Farqadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA	QIIMAHA	
WASAARADDA WARFAAFINTA, HIDAHA, DHAQANKA IYO DALXIISKA			
[11] (112) (4)	Shaxda 11.12 Ajuurooyinka Wasaaradda Isgaarsiinta		
	RUQSADAHA SHIRKADDAHA ISGAARSIINTA		
	Ruqsadda Isgaarsiinta Puntland		\$200,000
	Cusboonaysiin Ruqsadda Isgaarsiinta Puntland		\$10,000.00
	Ruqsadda Saldhiga isgaarsiinta xeebaha ee gadidka laga hago		\$100.00
	Cusboonaysiin Ruqsadda Saldhiga isgaarsiinta xeebaha ee gaadiidka laga hago		\$100.00
	Ruqsadda nooca Ateenada (VSAT) anteenada hay'duhu ku shaqaystaan oo u gaar ah		\$2,000
	Cusboonaysiin Ruqsadda nooca Ateenada (VSAT) anteenada hay'duhu ku shaqaystaan oo u gaar ah.		\$1,000
	Khidmadda Isticmaalka Hirarka oo Bille ah		
	Hirarka(frequencies) shirkadaha isgaarsiinta Nooca A : (GSM-900) Halkii		\$100
	Hirarka(frequencies) shirkadaha isgaarsiinta Nooca B : (1800)		\$50
	Hirarka(frequencies) ka kale		\$50
	Fiber Optic		
	Ruqsadda cusub ee Fiber Optic cable		\$300,000
	Cusboonaysiin Ruqsadda cusub ee Fiber Optic cable		\$20,000
	Madbacadaha iyo wargaysiyada	Cusboonaysiin	Diiwaangelin
	Ruqsadaha Madbacadaha Heerka 1-aad	\$200.00	\$400.00
	Ruqsadaha Madbacadaha Heerka 2-aad	\$100.00	\$250.00
	Ruqsadda wargaysiyada todobaadle, bille iyo ka badan	\$50.00	\$100.00
	Warbaahinta Madaxa Bannaan	Cusboonaysiin	Diiwaangelin
	Ruqsadda Ururada warbaahinta madaxa-bannaan Sannadle	\$250.00	\$500.00
	Mac-hadyada saxaafadda madaxa-bannaan Sannadle	\$100.00	\$200.00
	Ruqsadaha gawaarida wax lagu xayaysiiyo	\$30.00	\$50.00
	TV-yadda iyo adeegga la xiriira	Cusboonaysiin	Diiwaangelin
	Xarun Telefishin Caalami ah (Short-wave, FM, • Satellite — Frequencies in KHZ-2340,-5965-17760-21,660) iyo wixli ka sareeya	\$500.00	\$1,000.00
	Wakiillada TV-yada gaarka ah iyo wakalaadaha wararka madaxa bannaan.	\$250.00	\$500.00
	Khidmadda Telefishin Local Frequency Modulation (FM) 108-700 KHZ oo laga daawado	\$300.00	\$500



[MADAXA] (Qodobka) (Farqadda)	TIRSIGA & MAGACA SHAXDA	QIIMAHA
	magaalada uu yaallo oo keliya sannadle	
	Xarunta Cable BOX : Hilar la arurshay (frequency box) ee kanaalada kala duwan ciyaarah , filimaanta, wararka iyo barnamijyada kale	\$1,000.00
	Xarunta Cable BOX Satellite-ka ah Khidmad Bille ah	\$200
	Ruqsadda guud ee xayeysiinta shaashadaha muuqaalka mid kasta ee cusub	\$30.00
	Ruqsada shirkadaha filimada soo sacra (film • producers) ee cusub	\$100.00
	Ogyeysiisyada SMS-ka Shirkadaha Isgaarsiinta	5%
	Xayeysiiska 1V-yada	10%
WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.13 Ajuurooyinka Wasaaradda Beeraha	
	Maydi (Kiish)	\$1.6
	Beeyo (Kiish)	\$1
	Falax fala (Kiish)	\$0.81
	Caws (Kiish)	\$4
	Xabag cadaada (Kiish)	\$0.81
	Ceeryaamo (Kiish)	\$0.81
	Malmalka	\$0.81
WASAARADDA DEEGAANKA IYO ISBADELKA CIMILADDA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.14 Ajuurooyinka Wasaaradda Deegaanka	
	Nuuradda (Kiish)	\$2
	Xaabadda (Kiish)	\$1.5
	Milixda (Kiish)	\$0.135
HAY'ADDA QANDARAAS BIXINTA		
[11] (112) (4)	Shaxda 11.15 Shatiga Qandaraaslayaasha	
	Ruqsadda Cusub	\$102
	Ruqsadda Cusboonaysiin	\$60



WASAARADA TAMATA, MACDANTA IYO BIYAHA			
[11] (112) (5)	Shaxda 11.16 Shatiga Qandaraaslayaasha		
		Cusboonaysiin	Diiwaangelin
	Large scale mining	\$2,000	\$5,000
	Small scale mining	\$500	\$2,000
	Mediun	\$1,000	\$2,500
	Mining and processing equipment	\$500	\$1,500
	Dhismayaasha carro kaawada iyo bur burinta dhagaxa	\$400	\$700
	Muunada ka yar 1KG		\$150

